# HABRAACA HANAANKA KU LAAMANEEYNTA

# ARRIMAHA CARUURTA

**Waxaa diyaariyay waaxda ilaalinta iyo dhawrista xuquuqaha caruurta ee wasarada arrimaha haweenka iyo caruurta**

Maskaaram 2008 T.I.

# Qaybta koobaad

## Xalaadaha iyo fursadaha guud ee loo suurtogaliyey dhawrista iyo ilaalinta xuquuqaha caruurta

## 1.1. Hordhac

Caruurtu madaama ay yihiin kuwo jidh ahaan adkaan islamarkaana maskaxiiyan aan bislaan waxaa hubaal ah oo la ogsoonyahay in taageerada iyo daryeelka ay mudnaan yihiin ay damaanad u tahay sii jiritaanka qaybahan bulsho islamarkaana si ay u noqdaan muwaadiniin leh karti iyo dadnimo dhamaystiraan oo la wareega ayaaha dambe ee dalka waxay u baahan yihiin in loo dhamaystiro dhamaan arrimaha lama huraanka u ah kobocooda islamarkaana laga ilaaliyo xalaadkasta oo wiiqi karta inay si caafimaadqabta ku barbaaran. Habase ahaate, madaamada ay caruurtu calaamka ku nool gaar ahaan kuwa wadaamada soo kooraya ay u nuguulyihiin dhiibaatooyin iyo xadgudubyo daabici ah iyo kuwo adaamuhu sabaabay awgeed, ayay soo maareen maxalaado ay ku soo gaadheen waxyeelooyin joogto ah iyo dil.

Maadaama dhiibaatooyinkani haysta caruurtu ay noqdeen kuwo soo jiitay ahmiyada iyo indhaha dawladdaha ayaa lagu hawlahan yahay talaabooyin ay qaraamada midoobay, uruurka midoowga afrika iyo hay'ddaha kaleba ay ku soo saarista iyo ansixinta wadaamada xubnaha ka ah qayahani heeshiisyo iyo nidaamyo calaami ah oo iskaashi iyo kuwo degaan ee kala duwan ee wax ku oolka u ah dhawrista iyo ilaalinta xuquuqaha iyo fayaqabka caruurta iyo islamarkaana ay ay hirgaliyan oo ay ku dhaqmaan.

Heeshiisyadani waa kuwa xoojinaya in hanaan cadaali ah caruurta loo gaadhsiiyo adeegyada arrimaha bulshada, arrimaha dhaqaalaha, dhaqanka iyo kuwa madaaniga ahba, kuwa ka badbaadinaya xadudubyada iyo gaboodfalka kala duwan, oo waxtar u leh guud ahaan ilaalinta xuquuqaha aadaamaha ee caruurta kuna barbaaran hanaan dhaxalsiin kara muwaadiniin la wareegi kara masuuliyada mustaqbaalka ee dalka wuxuu qeexya in isla dhaqangalintooduna tahay masuuliyad saran dhamaan hay'addaha bahwdaagta oo dhan;

Si loo xaqiijiyo xuquuqaha iyo fayaqabka caruurta dalkeena oo ay ku barbaaran hanaan karaamo iyo kalsooni ku dheehan tahay waxaa la meel-maariyey talaabooyin kor loogu qadayo dhawrista iyo ilaalada xuquuqaha caruurta. Sidoo kalena, la isla ataabtay in ay waajib ku tahay dhawrista arrimaha caruurtu cidkasta oo ay khguseeyso.

Dalkeenu madaama u ansixiyey axdiga calaamiga iyo axdi qaraameedka uruurka midoowga afrika ee dhawrista xuquuqaha caruurta islamarkaana lagu aqoonsaday dastuurka dalka ayaa lagu talaabsaday in shuruucda hore dib u habeeyn iyo dib u eegis lagu sameeyay laguna soo daray qodob lagu ixtiraamayo islamarkaana wax ku ool u ah ilaalinta caruurta.

Sidoo kale waxaa lagu guulaystay oo natiijooyin la taaban karo laga soo hooyey dhaqangalinta iyo dajinta siyaasado horumaarineed oo si gaara mudnaan loogu siiyay ka fa'iidaysiga iyo ka qaybqadashada arrimaha caruurta.

Sidaasi daraadeed, si ay caruurta iyo dayartu u noqdaan kuwa la ilaaliyay xuquuqahooda iyo nabadqabkooda islamarkaana ay u noqdaan jiil leh karti iyo awood buuxda ay mustaqbaalka ku hanaan karaan hogaaminta dalkooda ayaa dhamaan qaybaha bahwadaagta oo dhan looga baahan yahay inay shaqooyinkooda ku lamaaneyaan arrimaha caruurta si ay ugu suuragasho ka qaybgalka fir-fircoon ee arrimaha siyaasada, bulshada iyo dhaqaalaha. Hadaba, hay'aduhu si ay arrimaha caruurta ugu laamaaneyan islamarkaana ay uga dhigan hanaan abaabulan oo hay'adeed islamarkaana loo baahday habraac tilmaamaya jahooyinka iyo qodobada asaasiga ah ee looga baahan yahay inay hirgaliyan ayaa waxaa lama huraan noqotay oo la diyaariyay habraacani hanaanka ku laamaaneynta arrimaha caruurta.

Habraacani oo ka kooban afar qaybood ayay qaybta koobaad ay xambarsan tahay xalaado guud, Xaaladaha iyo fursadaha Guud ee dhawrista xuquuqaha Carruurta dalkeena, qaab-dhismeedyada, shuruucda iyo siyaasadaha la xidhiidha daryeelka caruurta. Qaybta labaadna waxay ku saabsan tahay oo hanaan mug leh loogu faahfaahiyey ujeedooyinka habraaca fulineed, ahmiyada iyo sidoo kale macnaha loola jeedo ku lamaaneeynta arrimaha caruurta iyo arrimaha lama huraanka u ah ku laamaaneynta, qaybta sadexaadna waxaa lagu faah-faahiyay arriamaha ugu waa weyn ee hay'addaha bahwadaagta looga baahan yahay inay ku lamaaneyaan xilka iyo wajibaadyada sharci ahaan u idmanyihiin. Halka qaybta u dambeeysana lagu soo bandhigay doorka hay'addaha bahwadaagta ah kaga aadan dabagalka iyo qiimaynta hanaanka fulinteed ee arrimaha caruurta.

## 1.2. Xaalada Guud Ee Carruurta Itoobiya

### 1.2.1. **Xaalada arrimaha dadwaynaha**

wakaalada diwaangalinta iyo tiro koobka dalka itoobiya qiyaasta ama odoroska ay samaysay sanadkii **2011**[kii] tirsiga reer yurub waxay tilmamaysa tirada guud ee dadweynaha itoobiya oo dhan **84** milyan in **43,680,000 (52%)** ay yihiin caruur. taas oo tiro dhan **33,515,310 (87.26%)** ay ku nool yihiin miyiga, inta kale ee hadhayna oo ah tiro dhan **4,891,539 (12.76%)** ay ku nool yihiin magaalooyinka. dhanka kale tirada guud ee dhalaanka dalkeena **19,696,850(51.3)** waa wiilal(rag) halka **18,709,999 (48.7%)** ay ka yihiin gabdho (haween).

### 1.2.2. **Xaalada Caafimaad**

Maadaama dalkeenu diyaariyey islamarkaana dhaqangaliyey barnaamij kor loogu qaadayo ama wax lagaga badalayo xaalada caafimaad ee caruurta waxaa laga gaadhay guulo la taaban karo. arintani oo an tusaale u soo qaadan karno warbixintii ugu dambaysay oo muujinaysa in 1000kii caruura ee itoobiyaana ay dhintaan **59** ilmo ka hor sanad guurada koobaad ee ugu horaysa. Sidoo kale **1000** kii caruura ay ka dhintaan **88** canug inta aanay gaadhin sanad guuradooda shanaad. hadaba inkastoo arintan muujinayso in sanadkiiba dhimashada carruurta (dhalaanka) ee dalkeena ay aad uga hoosayso tirada dhimashada sanadihii hore ee la soo dhaafay. Hadana tirada caruurta ee sanad kasta sobobo kala duwan u dhinta maaha mid la soo koobi karo.

Sababaha ugu waawayen ee loo tiriyo dhimishada caruurta waxaa kamida Tiibiida,Duumada,shubanka ,xiiq dheerta,cuno xumo iyo xanuunka HIV/AIDS aydhiska; waxaa kaloo ka qayb qaata dhimashada dhalaanka dalkeena itoobiya nadaafad xumada hooyada ,heli taan la ,aanta biyo nadiifa ,dhalmada deg-dega (ba,aan) arimahaas oo ah saamaynta saamaynta ay caadooyinka xun-xuni kuleeyihiin dhimashada caruurta.

### 1.2.3. **Xaalada Waxbarasho**

Ka qaybgalka xaalada waxbarasho ee caruurta waa mid ku taxan heerarka waxbarasho ee bilaawga ah ilaa u diyaar garawga jaamacadaha, Xogta daraasaadka sanadlaha ee wasaarada waxbarashadu samaysay 2005[tii] waxay tilmaamaysaa in guud

ahaan ka qaybgalka waxbarashada caruurtu ay gaadhay heerka waxbarashada barbaarinta caruurta oo gaadhay 26% , waxbarashada dugsiga hooseena 95.53%, sidoo kalena waxbarashada dugsiga sare ay ahayd 24.4% . Sidoo kalena daraasadkani wuxuu muujiyey in ka qaybgalka heerarka nidaamka waxbarasho ee dugsiyadu ahaa mid gaadhay wareega koobaad ee dugsiga hoose (1-4) 96.5%, wareega labaad ee dugsiga hoose (5-8) u ahaa 47.3% , halka wareega koobaad ee waxbarashada dugsiga sare (9-10) u ahaa 19.4% iyo sidoo kale, wareega labaad ee dugsiga sare (11-12) u ahaa 5.3%.

Xogta daraasadakani waxaan ka ogaan karna in caruur badani ka fa'iideysteen fursadaha waxbarasho kadib markii dawladdu xooga saartay mudnaan gaarana siiyay kaalinta ka qaybgalka waxbarashada ee caruurta. Arrintani oo guulo la taaban karo laga soo hooyey, tirada ka qaybgalka ee caruurtuna kor u kacday. Habase ahaate, haddana waxaa jira caruur tira badan oo duruufo dhaqaale iyo arrimo bulsho awgeed, aan uga fa'iidaysan fursadahas waxbarasho. Gaar ahaan waxaa aad u hooseeya heertka ka qayb galka wax barashada bilawga, sida kalen dhinaca tayada waxbarashadu maaha mid gadhay heerkii loo bahnaa.

Sidaasi awgeed, hadaba si kor loogu qaado loona sii xoojiyo, guulaha laga soo hooyay ka qaybgalka iyo ka fa''iidaysiga caruurta ee nidaamka waxbarashada dalkeena islamarkaana loo saxo galdaloolooyinka ka jira dhinaca waxbarashada, waxaa loo baahan yahay in ay hal meel ah uga soo wada jeestaan dhamaan cidaha ay khusayso oo dhan.

### 1.2.4. **kaqayb galka caruurta**

Dalkeena waxaa ka jira talaabooyin fiican oo bilawa wax ka tarayana ama xoojinaya kor u qaadida ka qayb galka caruurta talaabooyinkaa oo ay ka mid tahay aasaasida golaha caruurta ,arintan oo suuro galainaysa in caruurto si xora u soo bandhigaan fikiradooda ,goloyaashan oo hada ka asaasan maamulada kala duwan ee dalkeena taasoy tiradoodu gaadhayso 60 ,sidoo kale waxaa dugsi kasta ka jira kalaab u dooda xuquuqdooda iyo danaha caruurta .dhanka kale waxaa jira barnaamijyo,istaraatijiyado iyo qorshayaal lagu abuurayo xaalad iyo jawi ay caruurtu ku soo bandhigaan

fiukiradooda . Habase ahaatee hadana ma odhan karno waxaan gaadhnay heer ilmo kasta loo sugay xuquuqdiisa ka qayb qaadasho.

Inkastoo mawduuca xoriyatal qawlku ee aan kor kaga soo hadalnay u yahay mid lagu xeeriyey shuruucda kala duwan ee dalkeena. Hadana maadaama ay baraaruga bulshada iyo qoysku yahay mid aad u hooseeya arintani may noqon mid fursad loo siiyo in caruurtu ka faa'iidaystaan xuquuqdani.

### 1.2.5. Waxyeelada Iyo Gaboodfalka Loo Gaysto Carruurta

Si wax looga qabto dhibaatooyinka loo gaysto carruurta dalkeena waxaa si muuqda loo meel mariyey talaabooyin sharci iyo maamul oo kor loogu qaadayo xaalada caruurta. habase ahaatee hadana inkastoo si cad loo oogay heerka ay taagan tahay (marayso) waxyeelada tacatiyada xoogan ee loo gaysto caruurta dalkeena hadana waxa cad oo muuqata In tiro badan oo caruurtu u nogulyihiin tacatiyada iyo gabood falada loo gaysto oo ay ka mid yihiin ficilada caadooyinka xun-xun sida guurka deg-dega iyo gudniinka fircooniga arintaas oo dhibaato weyn u gaysata muuqa iyo maskaxda carruurta isla markaana saamayn weyn ku reebta nolosha iyo mustaqbalka fog ee carruurta.

Dhibaatada kale ee saamaynta wayn ku yeelata waxaa kamida ficilada kufsiga iyo adoonsiga loo gaysto carruurta ficiladan oo waxyeelo u gaysta muuqaalka, maskaxda iyo nafsada carruurta. Dhanka kale maadaama ficiladani yihiin kuwo u dhaca qaab qarsoodiya islamarkaana bulshada iyo qoyska dhexdiisa in lagu soo qaado ay tahay mid loo arko ceeb iyo meel kadhac, gaar ahaan arinta la xidhiidha kubsiga ama galmada qasabka, ayaa waxay sababtaa in carruurtu u nuglaadaan ficiladas ka dhanka ah iyo in aan loo gudbinin booliska iyo haaydaha caddaalada taasi oo sababtay in ay sii bataan ficilada nuguleeyay xuquuqda carruurta.

### 1.2.6. Diwaan Galinta Dhalashada

Inkstoo qabka iyo nidamka loo diwan galiyo dhalashada iyo marxaladaha kale ee muhiimka ee si cad loogu faah-faahiyey xeerka madaniga ah ee dalka itoobiya. Ayaa Hadana maadaama ayna jirin qaabdhismeed u gaara oo si u meelmaariya nidaamka

diiwangalinta dhalashada iyo nidaam guud oo midaysan oo lagu diwaan galiyo dhalashada iyo marxaladaha kale ee muhiimka ah ayaa arrintaas waxay sabaabtay in aan dhalashada aan la diiwaangalin 90% taasi oo ay ku dhacaan bila shahaado.

Hadaba diwaangalin la'aantu dhibaatooyinka ay maamul iyo cadaaladeed ee dawladu ku hayso ,kasokow waxay saamayn weyn ku yeelatay sugida iyo xaqiijinta xuqquda iyo aminiaga carruurta ,habase yeeshee waxaa la filayaa in ay wx badan ka qaban doonto wakhtiga dhibaatooyinkaas aan kor ku soo sheegnay .maadaama ay mudobadan baarlamaanka dalku oo bayaankan ku  bayaamiyey wakaalada diwaan galinta marxaladaha muhiimka ah.

## 1.3. **Fursadaha sharci, siyaasadeed iyo qaab-dhismeed ee saaciidaya sugida xuquuqaha iyo fayaqabka caruurta**

Si dalka looga hirgaliyo horumar waara loona tir-tiro saboolnimada baahsan ee jirta waxaa la diyaariyay islamarkaana la dhaqangaliyay qorshayaal, siyaasaddo iyo istiraatijiyado horumaarineed oo lagu joogteynayo guud ahaan hawlaha horumarka ee dalka ka socda,. Kuwaas oo ah kuwo lagu xaqiijinayo sidii ay bulshadu uga fa'iidaysan lahayd gaar ahaan caruurtu.

### 1.3.1. **Sharciyada Iyo Nidaamyada Shaqo**

Dawladda Itoobiya si ay u ilaaliso xuquuqaha caruurta islamarkaana meesha uga saarto dhiibaatooyinka iyo tacatiyada loo gaysto caruurta, waxay aqbaashay oo ay ansixisay heeshiisyada calaamiga ah ee ilaalinta xuquuqda caruurta, axdiga xuquuqaha caruurta ee u yaala midoowga afrika, heeshiiska dabargoynta tacadiyada iyo ku xoogsiga da'yarta iyo sidoo kale qaraarada sugaya xuquuqaha iyo fayaqabka caruurta.

Sidoo kale waxaa qodobka 36 aad ee dastuurka dawlada dimuqraadiga fadaraalka itoobiya lagu xeeriyey nabdinka iyo koriinka ilmaha, waxaa qodobka 9aad farqadiisa 4aad lagu xeeriyey heshiisyada caalamiga ee itoobiya ansixiyey in ay ka mid yihiin shuruucda dalka waxaa kaloo qodobkan 41(5) lagu xeeriyey in dawladu iyadoo ka

duulaysa awoodeeda dhaqaale ay taageero iyo daryeel u fidiso dhamaan qaybaha bulshada ee baahiyaha gaarka qaba, waayeelka iyo agoonta ama caruurta cid korisa jirin. sidoo kale waxaa qodobka 13(2) lagu cadeeyey in dhamaan mabaadiida iyo qaraarada xuquuqaha aadaamaha ee aas-aasiga iyo qaraarada iyo heshiisyada calaamiga ee ilaalinta xuquuqaha aadaamaha ee itoobiya ansixisay iyo mabaadiida iyo mucaahadooyinka caalamiga in loo turjimo hab waafaqsan mabaadiida dastuurka lagu faahfaahiyey iyo sidoo kale dhokumantiyada sharci ee la xidhiidha xuquuqaha caruurta in si buuxda loo dhaqangaliyo.

Shuruucda kale ee hab waafaqsan dastuurka loo soo saaray waxay yihiin shuruuc mudnaanta siisay dhawrista iyo ilaalinta xuquuqda iyo fayaqabka caruurta. waxaa si xoogan loogu xeeriyey islamarkaana mudnaan lagu siiyey dhawrista iyo ilaalinta xuquuqaha iyo fayaqabka carrruurta sharciyada loo soo saaray oo ay ka mid yihiin xeerka qoyska ee dib loo habeeyey, xeerka ciqaabta iyo sharciga shaqada iyo shaqaalaha. sidoo kale waxaa si cad xeerka ciqaabta dawlada dimuqraadiga federaalka itoobiya loogu xeeriyey in cidkasta oo xadudubta ficillada ka dhanka ah xuquuqaha iyo nabadqabka caruurta.

### 1.3.2. **Siyaasadaha, Staraatijiyadaha Iyo Qorshayaasha**

Si loo dhimo saboolnimada dalkeenu wuxuu dajiyey islamarkaana dhaqan galiyey siyaasado istratijiyadeed iyo qorshayaal badan oo horumarineed oo lagu hirgalinayo hiigsiga horumarka qarniga. dhaqan galinta hawlaha horumarinta carruurtuna waxay qayb ka yihiin dhamaan siyaasadaha, staratijiyadaha iyo qorshayaasha la diyaariyey ee dhaqan galintooda gacanta lagu hayo. Siyaasadahaas oo ay ka mid yihiin siyaasadaha horumarinta arimaha bulshada, siyaasadaha horumarinta waxbarashada iyo tababarada, siyaasada horumarinta caafimaadka iyo dhalinyarada iyo sidoo kale siyaasado kala duwan oo ay qayb ka yihiin islamarkaana mudnaanta siiyey hawlaha horumarinta carruurta iyo daryeelka dhawrista xuqquqahooda. guud ahaanba, hadaba maadaama ay siyaasadahan ay carruurtu ka faaiidaysatay, ayaa mudo dhaaw waxaa la filayaa in la soo saaro siyaasad heer qaran ah oo si guud loogu illaaliyo xuquuqaha iyo fayqabka carruurta islamarkaana lagaga hortago dhibaatoyinka loo gaysto caruurta waxay mudnaan gaara la siiyey oo ay qayb ka yihiin hawlaha

horumarinta carruurtu Qorshaha shanta sano ee kobaca iyo horumarinta dhaqaalaha oo ku wajahan dhimista saboolnimada iyo joogtaynta horumar xawliya. Hadaba guud ahaan si loo ilaaliyo xuquuqaha caruurta loona dhawro nabadqabka iyo fayqabka carrruurta gaar ahaan carruurta ku jirta xaaladaha adag loo fidiyo gargaar iyo taakulaynta ay mudan yihiin, sidoo kaleena looga ilaaliyo gabood falada loo gaysto. Hadaba, Waxaa muhiim ah in dhamaan cidaha ay khusayso loo suurogaliyo lana mideeyo shaqooyinkooda islamarkaana la xoojiyo ka midho dhalinta qorshayaasha iyo shaqooyinka fulintooda gacanta lagu hayo.

### 1.3.3. **Qaab-dhismeedka**

Masuuliyada Gudiga joogtada ee golaha wakiilada shacabka iyo golaha xidhiibaanada ee deegaanad ee heerarka kala duwan ka aas-aasan iyo hufnaanta shaqooyinka haayadaha fulintu waxay saamayn weyn ku leeyihiin fulinta adeegyada arrimaha bulshada ee carrrurta. dhanka kale waxaa kaalin mug leh ka ciyaaray illaalinta iyo dhawrista xuquuqda carruurta qaab dhismeedyada kala duwan ee komishinka dhawrista xaquuqda aadamaha,  Haayada qaabiilada cabaashooyinka dadwaynaha iyo haayadaha cadaalada ka dib markay xooga saareen isla markaana mudnaanta siiyey hawlaha iyo shaqooyinka caruurta la xidhiidha. sidoo kalena waxaa la meel mariyey talaabooyin lagu xoojinayo shaqooyinka iyo qaabdhismeedka gudiyada heerarka kala duwan ka aasaasan , gudiyadas oo shaqooyinkoodu tahay dabagalka iyo meel marinta qorshe hawleedka iyo awaamiirta lagu sugayo xuquuqaha carruurta iyo isku dubaridka hawlaha iyo shaqooyinka ku aadan dhawrista carruuta ee ay fuliyaan hayadaha kala duwan iyo dhamaan hawlaha gudiga ilaalinta carrurta iyo qaybaha taakulaynta iyo taageerada caruurta agoonta ee xaalada adag ku jira .

Golayaasha caruurta iyo gudiyada carruurta ee heerarka kala duwan ka aasaasani waxay kaalin weyn ku leeyihiin dhisida iyo hirgalinta xuquuqaha carruurta iyadoo sidooda ay yihiin talaabooyinka sharci, siyaasadeed iyo maamul ee lagu sugay xuqquqda iyo fayqabka carruurta ee dawladu qaaday ayaa waxaa loo baahan yahay in la isku dubo rido lana mideeyo shaqooyinka iyo waxqabadka hayadaha kaa duwan islamarkaana lq saxo goddaloolada ka jira dhinacyada shaqada iyo fulinta sharciga

loona suuragaliyo in ilmo kasta ka fa'iidaysto hawlaha horumaarinta ee hay'addahasi qabtan.

# Qaybta Labaad

## Qodob Hoosaadka Koobaad

### 2.1. Diyaarinta Ujeedada, Muhiimada Ka Faaidaytayaasha habraaca Hirgalinta hanaanka Ku Laamaneeynta qorshaha Arrimaha Caruurta

### 2.1.1. **Ujeedada Guud ee Hirgalinta Habraaca**

Si loo ilaaliyo xuquuqaha iyo amniga carruurta waa in la suuro galiyo in arimaha carruurta ay qayb ka noqdaan siyaasadaha, barnamijyada iyo qorshayaasha horumarneed ee mudada dhaw iyo mudada fogba ee ay diyaariyaan hayadaha dawliga, kauwa aan dawliga ahayn, ururada muxaliga iyo xarumaha gaarka loo leeyahay.

### 2.1.2. Ujeedooyinka Faa-Faahsan Ee Shaqo Hagaha

- In la suuro galiyo in hayadaha dawliga iyo kuwa aan dawliga ahayn meel – mariyaan nidaam shaqo oo saacidaya ilaalinta iyo dhawrista xuquuqaha iyo danaha carruurta ;
- In la diyaariyo nidaam xogta la iskugu dhaafsado isla markaana lagu dhaqan galiyo, lagu dabogalo , lagu qiimeeyo dhaqan galka arimaha carruurta ee qaybta ka ah ama ku laaman dhamaan qorshayaasha hayadaha kala duwan ee ay arintu khusayso ;
- Iyadoo la xoojinayo wadashaqaynta dhamaan haayadaha ay khusayso isla markaana la iskugu duba rido dhaqdhaqaayada lagu horumarinayo illaalinta iyo dhawrista xuquuqaha carruurta ayaa kor loo qaadi nidaamka isticmaalka hantida.

### 2.1.3 **Ahmiyada Habraaca Hanaanka Ku Laamaneynta Arrimaha Carruurta**

- Maadaama xoog loogu baahday in la helo nidaam shaqo oo tilmaamaya arrimaha ugu waaweyn ee loo baahan yahay inay mudnaanta siiyaan hayaddaha ay khusayso iyagoo ka duulaya ujeedada loo aasaasay islamarkaana ayiidsan in arrimaha carruurtu ahayn hawl haayad kaliya u taala ee ay tahay shaqo balaadhan oo cidksta waajib ku tahay hirgalintoodu;
- Maadaama ahmiyd weyn u leeyahay nidaamka xoghaynta, wada shaqeynta iyo isku dubaaridka, dabagalka iyo qiimaynta arrimaha carruurta ayaa waxaa loo diyaariyey qorshe hagaha arrimaha carruurta.

### 2.1.4 **Diyaarinta Majuulka Qorshe Hagaha Arrimaha Carruurta**

Qorshe hagahan waxaa la diyaariyey iyadoo laga duulayo heshiisyada caalamiga ee itoobiya ansixiyey shuruucda ,xeer nidaameedyada iyo awaamiirta ilaalinta xuquuqaha carruurta iyo natiijada daraasaadka qorsheyaasha iyo hawlaha horumarineed ee dhalaanka la xidhiidha iyo sidoo kale qiimayn lagu sameeyey bayaanka iyo xeerarka lagu aasaasay hayadaha dawliga iyo kuwa aan dawliga ahayn iyo warbixinta shaqo ee adeegyada carruurta ee hada ka hor hayaduhu fuluyeen (qabteen).

### 2.1.5. **Ka Faa'iidaystayaasha Majuulka Qorshe Hagaha Arrimaha Carruurta**

Waxaa la filayaa in qorshe hagahan arrimaha carruurta ka faa,iidaysan doonaan dhamaan xubnaha iyo hayadaha dawlada ee heerarka kale duwan ka aasaasan urrurada aan dawliga ahayn , iskaashatooyinka iyo xarumaha gaarka loo leeyahay iyo sidoo kale guud ahaan cidkasta oo waajib iyo masuuliyadii ka saarantahay dhawrista iyo hirgalinta xuquuqaha carruurta .

## Qayb hoosaadka labaad

### 2.2. **Afkaarta, Ahmiyada Iyo Hirgalinta Qorshe Hagaha Arrimaha Carruurta**

### 2.2.1. **Afkaarta, Iyo Ahmiyada Qorshe Ku Lamaanaynta Arrimaha Carruurta**

Aragtida qorshe ku lamaanynta arrimaha carruurtu waa geedisocodka lagu kaydiyo laguna faafiyo xogaha adeegyada shaqo islamarkaana dabagal iyo qiimayn loogu sameeyo hirgalinta qorshaha iyo barnaamijyada la xidhiidha illaalinta iyo horumarinta xaquuqaha carruurta iyo guud ahaan, habka hayaduhu iyagoo ka duulaya ujeedooyinka loo aas-aasay ay wax uga qabtaan baahiyaha iyo dhibaatooyinka carruurta haysta ama soo food saara.

Dhanka kale waa majuul suurogalinaya islamarkaana jawaab waafiya ka bixinaya dhibaatooyinka iyo meel kadhacyada loo gaysto xuquuqaha iyo fayaqabka carruurta sidoo kalwena wax lagaga badelayo aragtida iyo wacyiga ay bulshadu ka amiinsan tahay xuquuqaha carruurta iyo sidoo kale in wax ka bedal lagu sameeyo nidaamka shaqo ee haayadaha fuliya adeegyada arimaha carruurta.

Maadaama dhibaatooyinka carruurtu yihiin kuwo aad u balaadhan oo qoto dheer ,xalinta dhibaatooyinkaasina tahay mid waafiya badina oo anay hayad kaliya wax ka qaban Karin ayaa waxaa loo bahan yahay si loo illaaliyo xuquuqaha iyo nabad qabka crruurta in dhamaan hayadaha kale duwan ku lamaaneeyaan arimaha carruurta qorshayaashooda iyo barnaamijyadooda islamarkaan hayadaha loo qabto miisaaniyad ku filan oo ay ku meel mariyaan hawlaha horumarinta arimaha bulshada,carruurta iyo sidoo kale hawlaha illaalinta dhawrista xuquuqaha carruurta oo ah waajibaadyada ugu waawayn ee ay haayadahaasi fuliyaan.

Maadaama guud ahaan arimaha ilaalinta xuquuqaha iyo daryeelka caruurtu yihiin kuwo wajiyo badan leh ayaa hadana waxa guud ahaan lagu soo koobi karaa xaalkooda qodobadan hoos ku xusan.

- Carruurtu maadaama muuq ahaan iyo maskax ahaanba ayna bislayn waxay qaybaha bulshada uga baahan yihiin taageero.
- Maadaama arrimaha illaalinta iyo daryeelka xuquuqaha carruurtu tahay mid u baahan shaqooyin farabadan ayaa waxaa loo baahan yahay in dhamaan hayaduhu mudnaanta siiyaan hirgalinta arrintaas.
- Maadaama tirade carruurta ee heer qaran tahay 52% islamarkaana yihiin mustaqbalkii iyo madaxdii barito ayaa waxay mudan yihiin in maskaxdooda iyo muruqoodaba daryeel iyo bar-baarin haboon loo sameeyo si ay u noqdaan jiil caafimaad qaba .
- Dhanka xuquuqaha aadamaha, carruurtu maadaama ay xaq u leeyihiin xuquuqda nolosha.koriinka,ka qaybgalka ,takooris la,aanta iyo sugida xuquuqda amniga islamarkaan loo dhaqan galiyo hab wadareed ka qayb gal balaadhan leh.
- Maadaama ay muhiim tahay in haayadaha kale duwan ka soo baxan waajibaadkooda shaqo si loo helo loona bar-baariyo jiil aqoon, cafimaad iyo asluub badan ku gaashaaman islamarkaana aqoon iyo awood u leh hanaansha iyo hogaaminta dalka.
- Maadaama hayadaha ay kkhusyso ay waajib ku tahay in ay fuliyaan dhamaan heshiisyada caalamaiga iyo axdiga dhawrista carruurta ee dawladu aqbashay

iyo hirgalinta shuruucda iyo qorshyaasha shaqo ee ku aadan dhawrista iyo hirgalinta xuquuqaha iyo fayaqabka caruurta.

Hadaba waxaa muhiima hirgalinta horumaarinta qodobada aan kor ku soo xusnay iyo qodobo kale oo badan oo aan halkan ku xasuusasanyn in hayadaha kala duwan ee arintu khusayso ay ku lamaaneeyaan arrimaha caruurta qorshayaashooda iyo barnaamijyadooda islamarkaana arimaha carruurtu noqdaan arrin hay'ad kasta ay hirgalinteeda ay mudnaan gaara siiso.

### 2.2.2. **Hirgalinta Qorshaha Ku Lamaanaynta Arrimha Carruurta**

Waxaa muhiima in barnaamijyad, mashaariicaha, qorshayaasha iyo hawgalada shaqo ee hayadaha dawliga iyo kuwa aan dawliga ahayn noqdaan kuwo mudnaan siiyey arimaha carruurta sidoo kalena loo baahanyhay in dhaqan galintooda dabagal iyo qiimayn lagu sameeyo islamarkaana la xaqiijiyo heerka ka faa'idaysiga carruurta iyo cadaaladnimadiisa. sidoo kale waxaa xubnaha hayadaha dawlada iyo haaydaha kale looga baahan yahay in xuquuqaha carruurta ee dastuurka lagu xusay iyo bayaanada hab waafaqsan habraacan loo soo saaray ay qayb ka noqdaan ama ku lamaanadaan arrimaha carrrurta qorshaha iyo barnaamijyadooda shaqo iyagoo ka duulaya qodobadan hoos ku xusan oo aas-aas u ah geedi socodka qorshaha ku lamaanaynta arrimaha carruurta:

- In la meelmariyo daraasaad ku saabsan arrimaha carruurta iyo dhibaatooyinkooda iyo qaabka xal waara loogu heli lahaa.
- In arimaha carruurtu qayb ka ahaato /ku lamanaato siyaasadaha, qorshayaasha, mashraacyada iyo barnaamijyada horumarineed ee ay fuliyaan qaybahan islamarkaana miisaaniyad ku filan loo qoondeeyo.
- Si loo xaqiijiyo dhqan galinta siyasadaha horumarinta hayadaha waa in dabogal iyo qiimayn lagu sameeyo qorshaha iyo barnaamijyada ka fircamay siyaasadooda.
- Nidaam hufan oo maamulka hantida, wuxuu jiri kara marka la xoojiyo xidhiidhka ka dhexeeya hayadaha horumarinta islamarkaana la isku dubaarido waxqabadkooda shaqo ee hayadahan.

- Si dabogal loogu sameeyo loona xaqiijiyo ka faadidaysiga carruurta adeegyadu waa inay noqdaan kuwo ku jaan go,an da,ada iyo jinsiga caruurta.
- Waa in miisaaniyad haboon loo qabto arrimaha illmaha, sidoo kale arimaha carruurtu noqdaan kuwo heer haayadeed lagu horumarinayo, sidoo kalena iyadoo la xoojinayo iskaashiga ka dhexeeya qaybaha wadashaqaynta leh waa in kor loo qaado awooda fulineed ee haayada.
- Iyadoo shaqaalaha, masuuliyiinta iyo macaamiisha hayadaha la siinayo tababaro ku saabsan dhawrista xuquuqda carruurta ayaa kor loo qaadi awooda fulineed.
- Qaybkasta waa inay diyaarisaa islamrkaana dhaqan galisaa siyaasadaha daryeelka carruurta.
- Adeegyada hayaduhu fuliyaan waa inay yihiin kuwo nasteex u ah carruurta.
- Iyagoo ka duulaya qorshaha ku lamaanaynta carruurta ee la diyaariyey ayaa waxaa loo baahan yahay in dhamaan qorshayaasha, barnaamijyada iyo mushruucyada hayadaha ay qayb ka ahaato (ku lamaanayso) arrimaha caruurta ismarkaana la suuro galyo nidaam lagu xaqiijiyo qaabka ay carruurtu uga faaidaysato hawlaha ay fuliyeen haayaduhu.
- Si look ala sooco baahida dadka waayeelka iyo mida carruurta waxaa muhiima in kor loo qaado wacyiga iyo ka qaybgalka carruurta,si ay jawab uga bixiyan su,aalaha iyo baahiyaha ay qabaan .
- Iyadoo la dhiiri galinayo kaalinta ka qaybgalka caruurta ayaa la suurogalin oo la abuuri jawi haboon ama fursad ay carruurtu kaga qayb qadan karto qorshayaasha hawlaha horumarinta, dhaqan galintooda iyo qiimayntooda , sidoo kale waxaa guud ahaan bulshada loo qaban wacyi galin balaadhan oo ku saabsan dhibaatooyinka loo gaysto carruurta iyo sida wax looga qaban karo.

# Qaybta Sadexaad

## 3. Haayadaha Qorshayaashooda Ku Lamaaneeyey Arrimaha Carruurta Iyo arrimaha Ugu Waaweyn ee Loo baahanyahay Inay Mudnaan Siiyaan

Hadaba si lagu sheegay qaybaha sare, qaybtani waxay ku sabsan tahay wajibaadka hay'addaha kala duwan ka saran in g/socodka diyaarinta iyo hirgalinta iyo dabagalka iyo komeerka qorshayaashooda, siyaasadahooda ay Ku Lamaaneeyey islamarkaana ay Mudnaanta Siiyaan Arrimaha Caruurta. Hadaba marka hay'adahani marka ay ku gudajiraan dhaqangalintaha hawlahani hay'adkasta iyadoo ka duulaysa qodobada u

yaala inay wax ku qorsheeysato inu ka cawiiyo islamarkaana barbiloow u ahaado ayaa loogu talagalay oo ahmiyadeedu tahay. Sidaasi daraadeed, arrimahani waa kuwo loogu talagalay in hay'addaha lagu xasuusiyo inay mudnaan gaara siiyaan arrimaha ku Ku Lamaaneeyey Arrimaha Carruurta oo raadraaca u noqoto diyaarinta jeeklistiga ay markasta u diyaarsadaan hawlahooda shaqo. Hadaba, xalaadaha faah-faahsan ee xasuusta mudan waxay kaalin weyn ka qaatan mudada lagu jiro diyaarinta qorshayaasha iyo mashaariicaha, hirgalinta, dabagalka iyo qiimaynta iyo sidoo kale, mudada lagu jiro diyaarinta warbixinada shaqo ee haya'ddaha bahwadaagta ah. Dhanka kale, haddii si haboon loogu dhaqmo qodobada xasuusiinayo waxay kaalin mug leh ka qaadan karan hirgalinta iyo ka fa'iidaysiga hawlaha horumaarinta iyo hawlaha horumaarinta xuquuqaha caruurta. Sidaaasi daraadeed, hay'aadaha bahwadaagta ah ee ka hawlgala heerarka kala duwan marka laga eego arrimaha looga baahan yahay inay dhinacyada ilaalinta caruurta ay mudnaan siiyan waxaa hanaan faahfaahsan loogu soo bandhigay qaybaha hoos ku xusan.

## 3.1. Arimaha loo Baahan Yahay Inay Mudanaanta Siiyaan Golaha Sharci Dajinta Iyo Qaybaha Dabogalku

Qayb hoosaadku waxaa qayb ka golayaasha, xildhbaanada ee aas-aaska heerka kala duwan iyo qaybaha kale ee goloyaasha hoos yimaada oo ay kamid yihiin komishanka xuquuqda aadamaha iyo haayadaha dhawrista xuquuqaha

### 3.1.1. Golayaasha Heerarka Kala Duwan Ka Jira

**Jahooyinka ugu waaweyn ee mudnanta la siinayo**:- waxaa kamida inay dabogal iyo qiimayn ku sameeyeen islamarkaana carruurta u abuuran fursad u sahasha inay si haboon uga qayb qaataan geedisocodka hawlaha arimaha bulshada, dhaqaalaha iyo maamulka suuban iyo bayaanada x/nidaameedyada iyo awaamirta la soo saaray sidoo kale qorshayaasha iyo barnaamijyada horumarineed loona dhaqan galiyey sidii loogu tala galay iyo in carruurta oo dhani ka faaiidaysteen.

**Qodobada Faah-Faahsan**

- Soo saarista, ansixinta iyo gaadhsiinta bulshada inay soo saareen islamarkaan dhaqan galyeen shuruucda suura galinaysa in si haboon loo ilaaliyo loona dhawro nxquuqda carruurta.
- In dabo gal iyo xaqiijin ku sameeyeen dhaqan galinta ay bayaanada ,xeer nidaamyada,awaamiirta iyo go,aanada kala duwan ee goluhu ansixiyey
- Inay xaqiijiyaan qorshayaasha qaybaha xafiisyadu diyaarsadaan inay yihiin kuwo carruurtu ka faa, idaysan karaan.
- Waxay qiimayn oo ay xaqiijinayaan warbixinta wax qabadka shaqo ee xafiisyada golaha u soo gaadhsiiyey inay yihiin kuwo carruurta looga faa.ideeyey.
- Waxay iyagoo matalaya gudiyada joogtada ah dabagalaan hawlaha shaqooyinka hayadaha fulintu, fuliyaaan /suuragaliyaan ama sahlaya ka qaybgalka ama ka faaidaysiga carruurta.
- Waxay suuro galyaan in carruurtu ka qayb qaadato dhaq-dhaqaayada goluhu ku lug leeyahay.
- Si kor loogu qaado dhismaha nidaamka maamulka suuban, waxay abuuran dhismaha nidaamka hufan oo lagaga jawaab celiyo cabashooyinka kala duwan.
- Waxay suuro galinayan in golaha iyo golayaasha kale ee hoos yimaada ay qorshyaashooda ku lamaaneeyaan ama qyb ka noqdan arrimaha carruurta isla markaana si haboon oo dabo gal loogu sameeyo dhaqan galintooda.
- Waxay dajiyan nidaam shaqo oo lagula xisaabtamo haayadaha /xafiisyada arimaha caruurta waajibaayadooda ku guuldaraysta fulinta waajibaadyadooda fulinta arimaha carruurta,
- Iyadoo wada shaqayn xoogan lala samaynayo ciddaha ay khusayso ayaa hab wafaqsan mabaadiida ka qayb galka iyo dhawrista xuquuqda carruurta ,u xoojiyan dhismaha sharciyada golaha carruurta.
- Waxay suuro galyaan inay ka qayb galka carruurto noqoto mid waara oo qaab dhismeed ahaan loo meel mariyo.
- Waxay suuro galyaan in codka carruurta la dhagaysto oo mudnaan la siiyo goobkasta oo ay ka socoto dhagaysiga dacwadaha ay carruurtu ka dhnka tahay.

- Waxay suuro galyaan/sahlaan fursadaha ay carruurtu kaalin weyn uga yeelan lahaayeen ka qayb qaadadhada arimaha bulshada, siyaasadaha, maamulka iyo dhaqaalaha.
- Waxay diyaariyaan oo ay xoojiyaan nidaamyo shaqo oo carruurta u sahlaysa garashada damiirka xilka iyo waajibaadka, ayaa waxay diyaarin nidaamyo xoojinaya damiirka iyo masuuliyada carruurta iyo inay mustaqbalka noqdaan kuwo xilksanimo iyo masuuliyadi ka muuqato.
- Waxay suuro galiyaan farsamada iyo nidaamka lagu taakuleeyo iyo taageero loogu sameeyo carruurta agoonta iyo kuwa xaalad adag haysato.
- Waxay suuro galyaan nidaam gargaar iyo caawimo loogu fidiyo carruurta agoonta iyo carruurta ku jira xaalada adag.

### 3.1.2. **Koomiishinka Xuquuqaha Adaamaha**

**Jahooyinka mudnaanta leh:-** waa suurtogalinta nidaam caruurta lagga ilaaliyo gaboodfalada kala duwan ee lagu kaco iyo inu sharciga mariyo cidkasta oo ku xadgudubta xuquuqaha caruurta;

**Qodobada faah-faahsan**

- Wuxuu isagoo hirgalinaya talaabooyin iyo dhaqdhaqaaqyo kor loogu qadayo xuquuqaha caruurta iyo wacyiga bulshada eek u aadan dhawrista xuquuqaha caruurta u suurogaliya in cidkasta ilaaliso islamarkaana ay dhawrta xuquuqaha caruurta ee waajibku ka saran yahay ilaalintooda;
- Isagoo ka duulaya natijaada baadhista ee u sameeyo ama cabaashooyinka ka dhanka ah dambiyada ee loo soo gudbiyo ayaa wuxuu gudbiya ra'iyi go'aameedka suurogalinaya cadaalad maarinta dacwaada u koomiishinka u ooggayo;
- Wuxuu suurogaliya in axdiyada calaamiga ee dhawrista xuquuqaha caruurta ee Itoobiya qaybta ka tahay in lagu turjumo luuqadaha kala duwan ee dalka lana gaadhsiiyo qaybaha ay khuseeyso oo dhan;
- Wuxuu isagoo xidhiidh iyo wada shaqeeyn wanaagsan la sameeynaya cidaha ay khuseeyso u suurogaliya in caruurta loo abuuro fursado iyo goobo ay fikiradahooda ay ku soo bandhigi karaan ;

- Wuxuu cidaha ay khuseeyso talo bixin ku gudbiya in dib u habeeyn lagu sameeyo shuruucda dhawrista xuquuqaha caruurta ee dhaqangalintooda caqaabadaha lagala kulmay iyo in la soo saaro shuruuc cusub oo kor u qadaysa ka fa'iidaysiga caruurta ;

3.1.3. **Hay'adda qabiilaada cabaashooyinka dadweynaha**

**Jahooyinka mudnaanta leh:-** waa hirgalinta nidaam shaqo oo hufan oo caruurta ka ilaaliyo dacatiyada iyo caddaalada maamul iyo suurtogalinta fayaqabka caruurta islamarkaana sharciga la horgeyo cidkasta oo ku kacda faldambiyeed ka dhan ah caruurta.

**Qodobada faah-faahsan**

- In la abuuro nidaam shaqo oo ilaaliya xuquuqaha helitaanka, xafidada iyo xogaha la xidhiidha arrimaha caruurta;
- Hay'addaha fulintu iyagoo ka duulaya natiijada baadhitaanka ay iskood u sameeyan ama cabaashooyinka loo soo gudbiyo ayay soo gudbiyan fikraadaha iyo afkaarta ra'iy go'aameed ee waxtarka u leh caddaalad maarinta kiisaska ka dhanka ah xuquuqaha caruurta;
- Wuxuu isagoo xidhiidh iyo wada shaqeeyn wanaagsan la sameeynaya cidaha ay khuseeyso u suurogaliya in caruurta loo abuuro fursado iyo goobo ay fikiradahooda ay ku soo bandhigi karaan ;
- Wuxuu isagoo daraasad ku sameeynaya macnaha iyo sabaabaha dhaliya dacaatiyada maamul eek a dhanka ah danaha caruurta ayuu talo-bixin u gudbiya cidaha ay khuseeyso;

3.2. **Arrimaha loo baahan yahay in ay mudnaanta siiyan hay'addaha garsoorku**

Qaybtani waxaa ka mid ah xubnaha federaalka iyo deegaanka ee heerarka kala duwan ka jira ee awoodda u leh in ay fasiiran ama maxkamadaha iyo hay'addaha kale ee hoos yimaada.

**Jahooyinka mudnaanta leh:-** waa xaqiijinta in go'aanada iyo g/socodyada dacwaadaha maxkamadaha ee ku sabsan arrimaha caruurtu noqdaan kuwo

nasteex ah, sugan oo cadaali ah islamarkaana xeeriya xuquuqaha iyo danaha caruurta.

**Qodobada faahfaahsan**

- Waxay xaqiijiyan in go'aanada maxkamadaha ee la xidhiidha koriinka ilmaha, xanaaneynta , daryeelka , aqbaalada iyo ayiidada aabonimadu ay yihiin kuwo ku saleeysan dsanaha iyo fayaqabka ilmaha;
- Waxay hirgaliyan nidaam shaqo oo hufan oo suuragaliya in maxkamaduhu go'aan deg-dega ah ka gaadhan dacwaadaha caruurta la xidhiidha ee ay gacanta ku hayaan;
- Waxay hubiyaan in mudada lagu gudajiro dhegaysiga dacwaadaha caruurta ka dhanka ah inay goobjoog ka noqdaan caruurta iyo cidaha kale ee la socota iyo in maxkamdauhu ay si haboon u dhegaysteen doodahooda;
- Waxaa iyadoo laga duulayo da'da iyo xalaada caruurta la xaqiijin mudada lagu gudajiro dhegaysiga dacwaadaha caruurta in caruurta la siiyay fursad iyo xalaad ay ku cabiiri karaan fikirkooda;
- Waxay sugan islamarkaana xaqiijiyan in aan meel lagaga dhicin xuquuqaha shakhisyeed mudada lagu jiro dhegaysiga arrimaha caruurta;
- Waxaa iyadoo cidaha ay khuseeyso wada shaqeeyn adag lala sameeynayo la suurogalin dhismaha fadhi iyo qoolool ku haboon dhegaysiga dacwaadaha caruurta iyo markhaatiyaadooda;
- Iyagoo go'aanada dacwaadaha caruurta la xidhiidha loo kala saarayo nooca, jinsiga,da'da iyo xalaada fuliyayaasha ayaa si haboon loo xafidii xogta caruurta la xisdhiidha , haddii loo baahdana waxaa si gaara loo dhawri sir ahaantooda;

## 3.3. Arrimaha loo baahan yahay inay mudnaanta siiyan hay'addaha fulintu

Qaybtani waxaa ka mid ah qaybaha fulineed ee heerarka kala duwan ee federaalka iyo deegaanada ka jiraa ama wasaaraadaha, xafiisyada deegaanada, gobollada iyo degmooyinka iyo hay'addaha kale ee hoos yimaada.

### 3.3.1. Arrimaha haboon in mudnaan lagu siiyo qaybaha arrimaha haweenka, caruurta iyo dhalinyaraada

**Jahooyinka ugu muhiimsan ee mudnaanta leh :-** iyadoo la fuduudeynayo xalaadaha ku haboon ee suurtogalinaya taabogalinta hawlo ku aadan hanooninta wacyiga, kobcinta awooda fulineed iyo abaabulka caruurta si caruurtu uga fa'iidaystan g/socodka hawlaha arrimaha bulshada, dhaqaalaha iyo maamulka suuban iyo in ay ka qaybgal fiican ay ku yeeshan islamarkaana iyadoo la dabagalayo dhaqangalinta qorshayaasha iyo barnaamijyada horumaarineed, bayaanada, xeerarka iyo awaamiirta ku soo baxday ama ku aadan xuquuqaha caruurta in la ilaaliyo xuquuqaha iyo amaanka caruurta;

**Qodobada faah-faahsan**

- Taabogalinta hawlaha iskudubaaridka, dabagalka fulintooda, qiimaynta iyo tageerosiinta in si munaasib ah oo waara loo hirgaliyay axdiga xuquuqaha caruurta, iyo sidoo kale, siyaasadaha, barnaamijyada hawlgal, qorshayaasha horumaarineed ee heer qaran ee ku soo baxay ilaalinta iyo daryeelka xuquuqaha iyo fayaqabka caruurta;
- Dhirigalinta iyo dabagalka hawlaha hay'addaha aan dawliga ahayn ay ka qabanayan dhinacyada caruurta si xalaadaha bulsho iyo dhaqaale ee caruurta loo gaadhsiiyo heer fiican oo sare.
- Isku dubaaridka, dhirgalinta , abuurista xalaadaha ku haboon iyo tageero-siinta sidii heerarka kala duwan looga asaasi lahaa islamarkaana xoojin lahaa barlamaanka iyo kiilabyada caruurta ee ay ku kobcinayan ka qaybgalkooda iyo haybaadooda iyo kartidoodaba iyo sidoo kale, uruurinta, isku habeeynta macluumaadka ku sabsan ka qaybgalka iyo ka fa'iidaysiga caruurta islamarkaana macluumaadka la siiyo laamaha u baahan;
- In qaybaha bulshada ee ku sugan jaran-jarooyinka kala duwan ay u soo bandhigan/baran, ku baraarujiyan, hanooniyan islamarkaana ay fuliyo hawlo wacyigalin oo la xidhiidha siyaasadaha caruurta islamarkaana la abuuro abaabul bulsho oo ku aadan hirgalinta siyaasadani/Community Mobilization/ iyo sidoo kale, si loo xakameeyo loogana hortago gaboodfalada xooga ku saleeysan, ficilada cadooyinka xun iyo aragtiyaha guraacan ee ka dhanka ah ama lagula kaco caruurta loona dardargaliyo daryeelka iyo taageero-siinta caruurta ee

mujtaamaca iyadoo la agaasimay fagaarayaal kala duwan oo hanoonin iyo wacyigalin waa in bulshada iyo qaybaha bahwadaagta ahba la baro, lana siiyo tageero awood kobcineed.

- Diyaarinta barnaamijyo lagu dhirigalinayo qaybaha bulshada, uruurada, xaruumaha diimaha iyo jaamacyada kaalin hormuudnimo ka muujiyay geediga dabargoynta ficilada cadooyinka xun;
- Iyadoo la suurtogalinyo in xafiisyada kala duwani ay arrimaha caruurta ay siiyan jawaab-celin hay'addeed in dabagal iyo tageeroba laga gaysto sidii arrimaha caruurta loogu dari lahaa dhamaan qorshayaasha iyo barnaamijyada horumaarineed;
- Ka shaqeeynta sidii loo kobcin lahaa awooda fulineed ee hay'addeed ee dhinacyada awooda ka qaybgalinta ama ku darida arrimaha caruurta;
- Fuduudeeynta xalaadaha ku haboon ee hay'addaha dawladdeed ay isku dhaafsan lahayeen khibraad wadaag ku aadan dhinacyada awooda ka qaybgalinta ama ku darida arrimaha caruurta; dhirigalinta iyo ayiidada kuwa maraya heer sare oo fiican;
- Taabogalinta hanaan shaqo oo suurtogalinaya in xafiisyada dawladda ee saktartani ay soo gudbiyan qorshe iyo warbixin xillile ah, qiimaynta iyo ka jawaab-bixinta in warbixintu wafaaqsan yahay ama ku saleeysan tahay ama waxaa laga qabtay marka laga eego hawlaha qorsheysna, taabogalinta dabagal iyo la socod adag oo ku jahaysan sida loo fuliyey talo-bixinta iyo jawaab-celinta warbixinta;
- iyadoo ahmiyad gaara la siinayo caruurta da'yarta ah ee laxaadka la' In qaab iskaashi ay qaybaha ay khuseeysa uga wada shaqeeyan sidii loo sugi lahaa danahooda dhaqaale iyo bulsho ee qaybahani;
- Bixinta tababaro, agaasimida daraasado iyo mashaariico la xidhiidha arrimaha caruurta iyo sidoo kale, toosiinta mashaariicaha ay diyaariyan hay'addaha bahwadaagta ah islamarkaana suurtogalinta in caruurtu ka fa'iidaystaan.
- Iyadoo la qadanayo khiibraadaha fiican ee la halmaala hawlaha laga qabtay dhinacyada arrimaha caruurta in la Suurtogaliyo lagana warbixiyo xalaadaha lagu dardargalinayo;

- Suurtogalinta in bulshada la siiyo waxbarasho iyo wacyigalin lagu baraarujinayo garaadka bulshada ee ku aadan xigmada hanaanka barbaarinta dhalaanka;
- In iaydoo la kaashanayo hay'addaha bahwadaagta ah munaasibada maalinta calaamiga ah iyo heer qaraadeed ee caruurta loogu dabaaldego barnaamijyo kala duwan wacyigalinta iyo hanooninta;
- Dabagalka in maalka iyo dhaqaalaha loo qoondeeyay ama tabaarucay daryeelka, faya-qabka iyo sugida xuquuqaha caruurta hanaan munaasiba loogu fuliyay ujeedooyinkii loogu talagalay;

### 3.3.2. **Arrimaha Mudnaan Lagu Siinayo Qaybaha Arimaha Caafimaadka**

**Jahooyinka ugu muhiimsan ee saktarkani:**- waa in iyadoo la horumaarinayo xalaada caafimaad ee caruurta lana suurtogalinayo si caruurtu ugu barbaari lahayeen koriin jidheed iyo maskaxeed oo dhamaystiraan waa in la xaqiijiyo xuquuqaha ay caruurtu u leeyihiin inay nooladaan islamarkaana ay helaan koriin caafimaad qaba.

**Qodobada faah-faahsan**

- Suurtogalinta in la soo saaro siyaasado iyo shuruuc xaqiijinaysa ka fa'iidaysiga caruurta ee qaybaha caafimaadka, diyaarinta qorshayaal iyo u qoondeeynta miisaaniyad ku filan islamarkaana dabagalka iyo korjoogteynta dhaqangalintooda;
- Hindisida barnaamijyo iyo dajinta hanaanka balaadhinta adeegyada lagu xakamaynayo dhimashada ilamaha todobo ku dhaloowga ah, suurtogalinta marka ay u daabaldegayan munaasibada dhalashada sanadguurada shanaad waa inay ku xusan in si loo dhimo dhimashada ilamaha iyo hooyada in hooyooyinka uurka leh ay helaan adeegyada lama huraanka u ah ka hortagga cudurada faafa iyo laga bilaabo marka ay uureystaan ilaa inta u ilmuhu dhalanayo in hooyada la siiyo adeegyada xanaanada caafimaadka iyo cunto isku dheelitiraan, si looga hortago caruurta ku dhasha miisaan ka hooseeya heerka looga baahna, si looga ilaaliyo cudurada ku yimaada faytaamin 'A' iyo dhiga la'aanta iyo cuntada lagu suumoba, in muddo cayiman gudaheedba ay mar helaan adeeg daweeyn iyo

sidoo kale, in la baaladhiyo lana gaadhsiiyo adeegyada daweeyn ee suurtogalinaya in cudurka HIV/AIDska ayna hooyadu u gudbin ilamaha.

- Suurtogalinta in caruurta la nool cudurka HIV/AIDHSku ay u heli lahayeen daryeel iyo tageero islamarkaana loo fidiyo adeegyada ku haboon ee lagu xakamaynayo si ayna caruurta u soo gaadhin uguna nuglaan dhibaatooyin kala duwan dhinacyada caafimaadka iyo damiirkoodaba;
- Hirgalinta hawlo wacyigalin iyo baraarujin oo horseedi kara dabargo'ynta cadooyinka xun ee waxyeelada taban ku leh caafimaadka caruurta;
- Hirgalinta hawlo wacyigalin iyo baraarujin oo ku aadan hanaanka daryeelka caafimaadka iyo quudinta caruurta, muhiimada naaska hooyada, qorshaha qoyska iyo cudurka HIV/AIDSka si caruurtu u awoodan ilaalinta nadaafada shakhsi iyo mida degaanba, helitaanka biyo nadiif ah oo la cabo iyo koriin fiican oo dhamaystiraan;
- Taabogalinta barnaamijyo horseedi kara in shacabka la gaadhsiiyo adeegyo waxbarasho oo dhamaystiraan islamarkaana fulintooda la dabagalo;
- Xaqiijinta in caruurta dhamaan dalka oo dhan la gaadhsiiyay dawooyin iyo agabka daweeyn ee ku filaan ee lama huraanka u ah caafimaadka buuxa ee caruurta oo dhan, iyo sidoo kale, xaqiijinta habsami u fulintooda;
- Suurtogalinta talaabooyin dhinaca dhismaha awooda fulineed ee horseedi karta in la ogaado laxaad la'aanta soo gaadhi karta caruurta;
- Balaadhinta iyo gaadhsiinta adeegyada waxbarashada caafimaadka dhalmada iyo qorshaha qoyska;
- Fuduudeynta xalaadaha ku haboon ee caruurta la tuuray iyo kuwa waalidooku u nuugulyihiin caafimaad darada loogu fidinayo adeeg bilaash ah;
- In daryeel iyo tageero gaara loo fidiyo caruurta lagula kacay xadgudub xoog loo adeegsaday ee daweeyn u imaanaya ayna u gaadhin silic iyo gaboodfalo dheeri ah, islamarkaana in xilliga ku haboon macluumaadyadas hanaan munaasib ah loogu gudbiyo hay'addaha caddaalada lana hirgaliyo xaruumo daryeel iyo daweeyn oo u gaar ah;

Xafiiska ka Hortaga iyo Xakamaynta cudurka HIV/Aidska

- Caruurta lagula kacay gaboodfal xoog ku saleeysan ee daaweeyn u imaanaya si ayna u soo gaadhin silic dheeri ah, waa in siyaabo gaara loogu fidiyo daryeel iyo kalmoba, macluumaadyada waa in qaabka ugu munaasibsan xilliga ku haboon lagu gaadhsiiyo hay'addaha caddaalada iyo in la suurtogaliyo jiritaanka xaruumo madaxbanaan oo daryeel iyo daaweeyn,
- Diyaarinta iyo hawlgalinta awaamiir iyo habraacyo gacan ka gaysanaya Sidii caruurta waalidkoodii ku waayey cudurka HIV/AIDSka ama u nuugul cudurkani loo siin lahaa adeegyada ku haboon ee daryeel iyo tageeroba;
- Si caruurta waalidkoodii ku waayey cudurka HIV/AIDSka ama u nuugul cudurkani loo siiyo adeegyada ku haboon ee daryeel iyo tageeroba waa in la suurtogaliyo lana hogaamiyo xalaadaha lagu soo uruurinayo maalka iyo gaashiga loo baahan yahay islamarkaana la gaadhsiiyo caruurta;

3.3.3. **Arrimaha Mudnaan Lagu Siinayo Qaybaha waxbarashada**

**Jahooyinka ugu muhiimsan ee saktarkani:**- suurtogalinta in dhamaan caruurta gaadhay da'dii waxbarashada ay barnaamijyada waxbarashada rasmiga ah iyo waxbarashada barbaarinta lagu gaadhsiiyo waxbarasho tayadeedu sugan tahay;

**Qodobada faah-faahsan**

- In la Xaqiijiyo in caruurta looga fa'iideeyay iyo dhaqangalka siyaasadaha, shuruucda, xeerarka iyo awaamiirta qaybta ka ah saktarka waxbarashada iyo sidoo kale, in dabagal iyo kormeerba lagu sameeyo inta la diyaariyay qorshayayaal iyo barnaamijyo islamarkaana inta miisaaniyad loo qoondeeyay la hirgaliyay;
- Soo saarista iyo xaqiijinta dhaqangalka habeega waxbarasho iyo tababarada horseedi karaa kobcinta kartida maskaxeed iyo jidheed iyo haybaada iyo dadnimada caruurta;
- Hirgalinta barnaamijyo suurtogalinaya kor u qadiida ka qaybgalka waxbarashada barbaarinta, fidinta iyo gaadhsiinta waxbarashada hoose dhamaan caruurta gaadhay da'da waxbarashada,balaadhinta waxbarashada

dugsiyada sare iyo taclinta farsamada gacanta iyo xirfadaha iyo balaadhinta waxbarashada tageerada gaarka ah;

- Abuurista barnaamijyo kala duwan oo tageero iyo daryeel loogu fidinayo si caruurta agoonta ah eek u sugan xalaad xun oo nolooleed ayna sabaabo la xidhiidha dhibaatadas ayna waxbarashada uga loox-tuurin, xaqiijinta in talaabooyinka anshaxmaarinta ee dugsiyada waxbarashadu qaadan ayna noqon kuwo wiiqaya islamarkaana aan ka hor imaaneyn xuquuqaha asaasiga ee caruurta, xaqiijinta inyana sinaba u dhicin ganaax/talaabo jidhkooda waxyeelo u geeysaneysa.
- Fuduudeynta xalaadaha ku haboon ee xuquuqaha caruurtu loogu darayo ama ay qayb kaga noqonayan manhajka waxbarasho.
- Waa in la xoojiyo ka qaybgalka caruurta ee uruurada ama Kooxda laga asaasayo dugsiyada waxbarashada islamarkaana la suurtogaliyo in go'aanada lagu gaadhayo dugsiyada waxbarashada iyo degaanada ay ka tirsan yihiin ay noqdaan kuwo ku saleeysan ka qaybgalka caruurta;
- Caruurta u baahan tageerada gaarka ah iyo caruurta ka soo jeeda qaybaha bulshada ee xoolo-dhaqaatada ah iyadoo la adeegsanayo tabo kala duwan la gaadhsiiyo waxbarasho tayadeedu sugan tahay islamarkaana laga taabogaliyo barnaamijyada waxbarashada aan caadiga ahayn;
- Abuuista xalaadaha ku haboon islamarkaana wacyigalinta caruurta si loo kobciyo loona horumaariyo khibraada fahan, luuqadeed iyo wax akhriis ee dhalaanka;
- In laga hortago islamarkaana xakameeyo xalaadaha xun ee jidhka, koriinka fiican iyo damiirka ay caruurta ku keenan xadgudubyada dhalaanka ay kula kacan macaalimiinta, adrdaydu iyo xubnaha mujtaamaca goobaha dugsiyada waxbarashada, in hay'addaha ay khuseeyso lagala shaqeeyo si aan caruurta lagula kiciin guursiga aan da'dii guurka gaadhin, tahriibka/isku gudbinta sharcidarada ah iyo ku shaqeeysiga caruurta.

### 3.3.4. **Arrimaha Mudnaan Lagu Siinayo Qaybaha arrimaha bulshada iyo shaqaalaha**

**Jahooyinka ugu muhiimsan ee saktarkani:-** iyadoo laga hortagayo waxyeelooyinka bulsho, ku shaqeeysiga iyo ka fa'iidaysiga xooga caruurta, tahriibka/isku gudbinta sharcidarada ah ee halista galinaya amaanka iyo xasiloonida caruurta, iyadoo loo fidinayo adeegyada dib u dejinta iyo tageero-siinta iyo daryeelka in la sugo amaankooda iyo faya-qabkooda.

**Qodobada faah-faahsan**

- In la Xaqiijiyo in caruurta looga fa'iideeyay lana dhaqangalyay siyaasadaha, shuruucda, xeerarka iyo awaamiirta ku soo baxay saktarkani, fuduudeynta xalaadaha ku haboon ee caruurta la'aadka la' ay ku heli karan atgeero dib u dajin iyo mid jidheed iyo sidoo kale, inta la suurtogaliyo diyaarinta qorshayayaal iyo barnaamijyo islamarkaana loo qoondeeyo miisaaniyad in kormeer iyo dabagal lagu sameeyo hirgalintooda;
- Fuduudeynta xalaadaha ku haboon caruurta la'aadka la' ay ku heli karan atgeero dib u dajin iyo mid jidheed.
- In hay'addaha ay khuseeyso wada shaqeeyn lagala yeesho sidii loo qaadi lahaa talaabokasta oo munaasib ah oo lagu xakamaynayo islamarkaana hortagayo ficillada sharcidarada ah ee qaabkastaba xoog loogu afduubayo, cidkale loogu gudbinayo ama iibka ee lagula kaco caruurta;
- Iyadoo xuska munaasibadaha siyaabo kala duwan ula halmaala caruurta, munaasibada calaamiga xuska maalinta caruurta, iyo xuska maalinta caruurta ee Afrika la diyaarinayo barnaamijyo iyo fagaraayal kala duwan oo wacyigalin iyo baraarujin ah in la xuso loona dabaaldego iyadoo la adeegsanayo hay'addaha dawliga ah iyo kuwa aan dawliga ahayn iyo qaab-dhismeedyada bulshada ee kala duwan ee ay khuseeyso;
- Taabogalinta talaabooyin dib u dejin iyo ka hortag oo lagu caruurta u nuguul iyo kuwa shaqeeyaba lagaga badbaadinayo waxyeelada, suurtogalinta in caruurta xalaado dagaal iyo isku-dhacyada kala duwan iyo masiibooyinka dabiciga ah awgeed, uga baarakacay guuryahoodii dib loogu soo celiyo qoysaskoodii, islamarkaana la xaqiijiyo in ay heleen adeegyada arrimaha bulshada;

### 3.3.5. **Arrimaha Mudnaan Lagu Siinayo Qaybaha Caddaalada**

**Jahooyinka ugu muhiimsan qaybtani:-** suurtogalinta soo saarista shuruuc, xeerar iyo awaamiir horseedaysa ilaalinta iyo difaaca xuquuqaha iyo fayaqaabka caruurta, faafinta iyo dabagalka dhaqangalkooda iyo sidoo kale, inta laga hortago xadgudubka iyo gaboodfalka ka dhanka ah caruurta in hoos loo dhigo u nuuglaantooda oo haddii ay dhacaana la suurtogaliyo in caddaalad ay helaan.

**Qodobada faah-faahsan**

- Suurtogalinta sidii loo soo saari laha shuruuc iyo siyaasado la jaanqaadi kara xuquuquhu iyo fayaqaabka caruurta;
- Dabagalka iyo komeerka dhaqangalka shuruucda la halmaala caruurta;
- In markasta oo lagama marmaan loo arko hay'addaha fulinta la siiyo tageero iyo talo-bixin farsamo oo ku aadan xuquuqaha caruurta;
- Taabogalinta daraasadaha dib u habeeynta shuruucda la xidhiidha caruurta islamarkaana iyadoo la soo uruurinayo shuruucda ku sabsan xuquuqda caruurta in la suurtogaliyo sidii loo habeeyn lahaa islamarkaana waxka bedel loogu sameeyn lahaa;
- Taabogalinta barnaamijyo kala duwan oo kor loogu qaadayo garaadka iyo fahanka sharci ee bulshada oo ku aadan ilaalinta guud ahaan daryeelka xuquuqaha aadaamaha oo xuquuqaha caruurtuna ka mid tahay;
- Taabogalinta Daraasado loogu kuurgalayo asbaabaha keena dambiyaada ka dhanka ah caruurta iyo hindisida xeelado lagaga hortagayo dambiyada noocani ah;
- Isagoo mudnaan gaara siinaya qaybaha aan awood u lahayn inay dacwaad madani ah furtan waa inu isagoo matalaya u caruurta u dodo ama u hawlgaliyo qareen bilaa lacag ah;
- Isagoo ka duulaya awoodaha saktarkani lagu siiyay xeerka qoyska waa inu xaqiijiyo in loo fuliyay hanaan sugaya danaha iyo faya-qaabka caruurta;
- Xaqiijinta ixtiraamka xuquuqaha caruurta ku sugan xaruumaha dhaqan-celinta iyo xaruumaha lagu hayo caruurta dambiyada gala;

- Taabogalinta hanaan shaqo oo saciidaya caruurta islamarkaana horseedi kara xaqiijinta in g/socodka baadhista la ixtiraamay islamarkaana la dhawray xuquuqaha caruurta;
- In hay'addaha ay khuseeyso lagala shaqeeyo dardargalinta adeegyada caruurta lagula kacay xadgudubyada loogu fidin lahaa adeeg isku dhaaf ah oo lagu bixiyo hal goo boo kaliya, taabogalinta, dabagalka iyo tageero-siinta sidii loo hirgalin laha loona balaadhin lahaa hanaan heerarka kala duwan lagu gaadhsiinayo nidaamka caruurta lagu siinayo cadaymaha dhalashada;

3.3.6. **Arrimaha Mudnaan Lagu Siinayo Qaybaha booliska**

**Jahooyinka ugu muhiimsan hay'addaha booliska:**- si loo kobciyo garaadka iyo baraaruga shacabka ee ku aadan dambiyada ka dhanka ah caruurta in caruurta laga hortago islamarkaana laga ilaaliyo faldambiyeedkasta oo ka dhan ah caruurta;

**Qodobada faah-faahsan**

- In dambiyada ka dhanka ah caruurta lagaga hortago istiraatijiyada boolis ee ku salaysan ka qaybgalka mujtaamaca⁝
- Abuurista nidaam baadhis oo sahlaya in g/socodka baadhista xadgudubyada/dambiyada ka dhanka ah xuquuqaha caruurta ee lagula kaco caruurta ay noqdaan mid saciidaya caruurta;
- Xadgudubyada/dambiyada ka dhanka ah caruurta intay u kala saran nooca dambi, jinsiga, da'da iyo xalaada dambilayaasha ayay macluumaadkaas qaab habeeysan u xafidan islamarkaana sir ahaantiisa ay dhawraan.
- Taabogalinta daraasado iyo nidaamyo shaqo oo horseedi kara xakamaynta iyo ka hortagga xadgudubyada/dambiyada lagula kaco caruurta;
- Auurtogalinta in caruurta ku kacday faldambiyeed ay helaan kalmo/taageero munaasib ah iyo difaac iyo daryeel gaar ah iyo sidoo kala, in caruurta ay soo gaadhay xadgudubo loo geeystay loo diyaariyo goob ku meelgaadh ah oo lagu daryeelo islamarkaana loo abuuro siyaabo loogu fidin karo adeeg la talin;
- In bulshada iyo xubnaha booliska la siiyo baraamijyo wacyigalin iyo hanoonin oo ku aadan xuquuqaha caruurta;

- In hay'addaha dawliga iyo kuwa aan dawliga ahaynba lala yeesho wada shaqeyyn adag oo suurtogalinaysa ilaalinta iyo difaaca xquuqaha iyo fayaqabka caruurta;
- In dabagal lagu sameeyo islamarkaana sharciga lala tigsado dadka looga shakiiyay inay ku lugleeyihiin ficillada caruurta lagula kacaya gaboolfal galmo, ku xoogsiga ama shaqaysiga caruurta iyo tahriibka sharci darrada ah;
- Suurtogalinta in caruurta ku kacda faldambiyeedyo ay mudada lagu hayo xaruumaha booliska loogu fidin lahaa talaabooyin daryeel iyo taxaadir oo ku haboon;
- Suurtogalinta in sidii manhajyada waxbarashada ee xaruumaha tababarada booliska loogu dari lahaa xuquuqaha caruurta;

3.3.7. **Arrimaha haboon in Mudnaan Lagu Siinayo Qaybaha arrimaha dibada፣**

**Mudnaanta koobaad ee saktarkani፡-** waa in la suurtogaliyo in caruurtu fagaarayasha, dhacdooyinka, bandhigyada iyo tartanada heer calaami lagu agaasimo looga qaybgaliyo hanaan horseedi kara horumaarinta qaybgalkooda iyo higsiiga hal-aburkooda islamarkaana in la suurtogaliyo hanaan caruurta sabaabo la xidhiidha koriinkooda ama arrimo kale awgeed, dibada loo dhoofiyay ayna ku luumineyn dhaqankooda iyo ku xidhnaanta dalkooda iyo sidoo kale, taabogalinta siyaabaha munaasibka ku ah ilaalinta iyo dhawrista xuquuqahooda iyo fayaqabkoodaba.

**Qodobada faah-faahsan**

- In dalabyada iyo codsiyada la xidhiidha dal soo galida ama dal ka bixida caruurta ee loola golleeyahay si caruurtu ula midoowdo ama u tagto qoyskooda ee ay soo jeediyan caruurtu ama waalikoodu jawaab waafiya la siiyo;
- Taabogalinta talaabooyinka munaasibka ah ee lagu xakamaynayo islamarkaana lagula socoonayo ficillada sharci darada ah ee caruurta dalka lagaga saarayo iyo

kuwa lagu duudsiiyayo inay dalka dib ugu soo labtaan iyadoo qaybaha ay kguseeyso wada shaqeeyn lagala yeelanayo;

- Si loo dhirigaliyo ka qaybgalka iyo halabuurka caruurta waa in la dardargaliyo doorka ka qaybgal ee caruurtu ku yeelanayso fagaarayaasha, dhacdooyinka iyo dabaaldegyada heer calaami laga agaasimo;
- Xaqiijinta iyo taabogalinta talaabooyinka ku haboon si wadaamada xubinka ka ah ee saxeexay axdiga ayna caruurta asbaabo la xidhiidha qaab noolooleedka qoyskooda ama ciida soo koriisay, aragtidooda, diintooda awgeed, ayna u soo gaadhin eex iyo wax faquuq ah iyo ganaax aan macquul ahynba;
- Xaqiijinta in caruurta qaxooti ahaan dalalka dibada ku nool ay ka fa'iidaystaan xuquuqaha lagu qeexay xeerka ama axdiga xuquuqaha caruurta iyo heeshiisyada calaamiga ah ee xuquuqaha caruurta islamarkaana markasta oo la ogaado in lagu xadgudbay laga qaado talaabooyinka ku haboon;
- Si caruurta ku nool dalka dibadiisu ay u bartan luuqadooda iyo dhaqankooda waa in Iyadoo lala kashaanayo laamaha ay khuseeyso lahawlgaliyo hay'addaha waxbarashada iyo kuwa dhaqanka;
- Suurtogalinta in fagaarayasha calaamka laga aqoonsado hawlaha dalkeena laga qabtay dhinacyada caruurta iyo isbedelada la soo hooyay;
- Xoojinta xidhiidhyada labo geesoodka ah iyo xidhiidhyada dhinacyada badan leh ee ku aadan sidii hay'addaha ka hsaqeeya arrimaha caruurtu ay ku heli lahaayeen barnaamijyo kobcin awoodeed;

3.3.8. **Arrimaha Mudnaan Lagu Siinayo Qaybaha dhaqanka iyo dalxiiska**

**Mudnaanta koobaad ee saktarkani:-** suurtogalinta in caruurtu ay kobciyan dhaqankooda, in la dardargaliyo lana horumaariyo ka qaybgalka caruurta ee dhinacyada fanka iyo suugaanta islamarkaana la dabarjaro ficillada cadooyinka xun iyo aragtiyaha dib u dhacsan ee lagula kaco caruurta;

**Qodobada faah-faahsan**

- In laga shaqeeyo sidii loo ixtiraami lahaa islamarkaana suurogalin lahaa xaqa caruurtu u leeyihiin inay ku dhaqman dhaqankooda, ay ku hadlan islamarkaana qoraan luuqadooda;
- Fulinta talaabooyin munaasib ah oo wacyigalin iyo ka hortag si loo bedelo ama wiiqo ficilada cadooyinka xun iyo aragtiyaha taban ee lagula kaco caruurta;
- Suurtogalinta xalaadaha ku haboon siyaabaha caruurta laxaadka la' ay ku heli karaan goobaha adeegyada madaadala, dhaqanka iyo fanka iyo suugaanta ama farshaxaanka oo isku dhafan፧
- Ka shaqeeynta hawlo balaadhan oo wacyigalin iyo abaabul oo waxtar u leh ka hortagga iyo xakamaynta weerarka ay xadgudubyada lagula kaco caruurtu ku yeelan karaan dhaqanka bulshada, ka shaqeeynta balaadhinta iyo suurtogalinta goobaha akhriiska bulshada iyo loo kobciyo hab dhaqanka wax akhris ee caruurta,taabogalinta hawlo wacyigalin iyo dhirigalinta dabaacada buugagta iyo qoraalada caruurta;
- Suurtogalinta in caruurtu ay bartan taariikhda iyo goobaha soo jidaashada dabiciga ah leh ee dalkooda iyo deegaankoodaba.
- Suurtogalinta goobaha madadaalada wakhtiyada nasashada/fasaxa ee kaalinta ku leh koorinka maskax caafimaad qabta ee caruurta, asaasida iyo balaadhinta xaruumaha fanka, masraxa iyo sawiirada ee munaasibka u ah caruurta, abuurista xalaadaha ku haboon ee caruurtu kaga qaybgali karto tartanada iyo marxalaadaha fanka iyo hal-abuurka;
- Isagoo la kaashanaya qaybaha ay khuseeyso,islamarkaana dabagal iyo u kuurgal ku sameeynaya goobaha iyo ficillada wiiqaya ama dhawaacaya asluubta iyo akhlaaqda caruurta ayuu suurtogalin in la qaado talaabo sixitaan;
- Xaqiijinta in wax soo saarka iyo midhaha fanka iyo hal-abuurku ayna ahayn kuwo ka hor imaanaya xuquuqda caruurta;

3.3.9. **Arrimaha Mudnaan Lagu Siinayo laamaha xidhiidhka arrimaha dawladda iyo warbaahintu;**

**Mudnaanta koobaad ee saktarkani-** suurtogalinta in caruurtu macluumaadka munaasibka ah ee lama huraanka u ah koriinkooda maskaxeed, bulsho iyo ilaalinta damiirkooda ay ka helaan ilaha kala duwan ee qaran iyo calaamiba islamarkaana laga dhawro/ilaaliyo macluumaadka sameeynta iyo waxyeelada xun ku leh koriinkooda caafimaadka qaba.

**Qodobada Faah-Faahsan**

- Suurtogalinta in shacabka lala socodsiiyo islamarkaana la baro axdiyada calaamiga ah iyo xeerarka qaran ee la xidhiidha xuquuqda caruurta;
- Dhirigalinta in warbaahinta laga baahiyo maluumaadka wax ku oolka u ah la dhaqanka bulshada iyo arrimaha dhaqanka ee caruurta;
- Suurtgalinta in caruurta laga ilaaliyo macluumaadka halista ku ah barbaarinta fiican iyo asluubta wanaagsan ee caruurta;
- Xaqiijinta in ogaysiisyada/xayeeysiiska iyo faariimaha la baahinaya ay ahayn kuwa ka hor imaanaya xuquuqaha caruurta islamarkaana aan quudhsaneyn;
- Xaqiijinta in barnaamijyada kala duwan (riiwayadaha, madaadalada iyo xayeeysiiska kala duwan) ee laga baahiyo alaadaha kala duwan ee warbaahinta sida talefishiinka, idaacadaha iyo wax soo saarka dabaacaduhu ay yihiin kuwo ahmiyad siinaya xuquuqaha caruurta (child sensitive).
- Baahinta barnaamijyo suurtogalinaya indhamaan caruurta oo dhan gaar ahaan haweenka iyo kuwa laxaadka la' ay bulshadu ku eegto indho naxaaris leh;
- Si loo xaqiijiyo xaqa ka qaybgalka ee caruurta in caruurta la gaadhsiiyo adeegyada warbaahinta, suurtogalinta diyaarinta iyo baahinta barnaamijyo ku saleeysan caruurta, sida alaadaha warbaahinta yar ee dugsiyada, ilaadaha bulshada iyo xaruumaha macluumaadka bulshadu waa inay dhirigaliyan in xuquuqaha caruurta mudnaan la siiyo, iyadoo la balaadhinayo warbaahinta bulshada in la suurtogaliyo inay baahiyan barnaamijyo ku sabsan xuquuqaha caruurta, ficilada cadooyinka xun iyo xuquuqaha haweenka, si loo hakiyo ama xakamayo ficilada iyo aragtiyaha cadooyinka xun ee waxyeelada leh ee wiiqaya fayaqabka iyo ka fa'iidaysiga xuquuqaha caruurta waa in la abuuro fahanka iyo

bararaaug bulsho oo arintaas ku aadan, in hawlaha ku jahaysan caruurta eek u dayaashada mudan ee caruurta iyo hay'addaha bahwadaagtu fuliyeen inta dabool iyo mudnaan gaara la siiyo aad loo baahiyo islamarkaana khibraadaha fiican ee laga dhaxlay loo sii fidiyo; sdoo kale si xaqa ka qaybgalka ee caruurta looga xaqiijiyo qoyska dhexdiisa waa in warbaahinta laga baahiyo waxbarasho iyo cashiiro la xidhiidha daryeelka caruurta iyo xilka iyo wajibaadka looga baahan yahay caruurta ፣

- Taabogalinta hawlo wacyigalin ku salaysan qaab qoraal, riiwaayado, bandhigyo iyo xeelado kala duwan oo ku aadan si bulshadu tageero iyo daryeelo gaara ay ugu fidin lahayeen caruurta agoonta ah eek u sugan marxalaad liidata, iyo sidoo kale, in bulshada la siiyo wacyigalin la xidhiida hawlgalada iyo dhaqdhaqaaqyada lagu hawlan yahay iyo guulaha laga soo hooyey;
- Xaqiijinta helitaanka macluumaad ee caruurta qabta baahiyaha gaarka ah;
- Xaqiijinta in siyaasadaha iyo istiraatijiyadaha balaadhinta warbaahintu yihiin kuwo xambaarsan arrimaha khuseeya caruurta;
- In dadaalo taxane ah loo galo sidii fagaarayasha kala duwan ee arrimaha caruurtu ay warbaahintu u siin lahayd heer dabool iyo mudnaan gaara;

3.3.10. **Arrimaha Mudnaan Lagu Siinayo qaybaha maaliyada iyo Hor. Dhaqaalaha;**

**Mudnaanta koobaad ee saktarkani፡-** markasta oo la diyaarinayo, la fulinayo iyo marka la qiimaynayo qorshayaasha iyo hawlgalada horumarka iadoo dabagal iyo taageero-siin iyo komeerba lagu xaqiijinayo sida looga fa'iideeyay caruurta waa in la suurtogaliyo daryeelka xuquuqaha iyo amaanka caruurta.

**Qodobada Faah-Faahsan**

- Suurtogalinta in hawlaha laga qabanayo arrimaha la xidhiidha caruurta loo qoondeeyo miisaaniyad ku filaan.
- Taabogalinta nidaam horseedaya in la ogaado sameeynta ay caruurta ku yeelaneyan guud isbedelada iyo dib u habeeynta kala guurka nidaamka

dhaqaale, gaar ahaan kuwa ku nool marxalaad iyo xalaad nolooleed oo murugsan;

- Waxay meel-maarin darasaado logu kuurgalayo sameyn iyo waxyeelada ay caruurta ku leeyihiin go'aanada la gaadho iyo talaabooyinka siyaasadeed ee la qado.
- Qiimaynta iyo dabagalka hanaanka shaqo ee ku aadan ilaalinta xuquuqaha iyo amaanka caruurta ee hay'addaha samafalka ee ku hawlan arrimaha taabanaya caruurta, xaqiijinta in mashaariicaha ay dajinayan/abuurayan ay yihiin kuwo wafaaqsan oo ku saleeysan siyaasadaha iyo barnaamijyada ku soo baxay arrimaha caruurta;
- Xaqiijinta ka fa'iidaysiga iyo ka qaybgalka caruurta ee g/socodka dajinta qorshayaasha iyo barnaamijyada horumar iyo diyaarinta mashaariicaha;
- Xaqiijinta ka fa'iidaysiga caruurta ee hirgalinta siyaasadaha arrimaha dadwaynaha;

3.3.11. **Arrimaha Mudnaan Lagu Siinayo qaybaha Horumaarinta magaalooyinka iyo dhismaha፣**

**Mudnaanta koobaad ee saktarkani፡-** markasta oo la fulinayo qorshe-hagayaasha, nashaqaadaha, dhismayaasha magaalooyinka (sida dhismayaasha guryaha iyo xaruumaha adeeg bixinta, horumaarinta kabayaasha) inta la xaqiijiyo inay wafaaqsan yihiin islamarkaana ay buuxinayan shuruuadaha fayaqabka iyo amaanka caruurta islamarkaana ay ku jiraan goobo ku haboon caruurta oo ay ka baxan iyo meelaha madaadalada caruurta oo ay suurtogaliyan ilaalinta iyo dhawrista xuquuqaha iyo fayaqaabka caruurta;

**Qodobada Faah-Faahsan**

- Xaqiijinta in dhismayaashu gaar ahaan kuwa bixiya adeegyada bulshadu ay yihiin kuwo ku haboon oo ay adeegsan karan islamarkaana ku xisaabtamaya caruurta qaba laxaad la'aanta kala duwan;

- Xaqiijinta in Xaruumaha adeeg-bixinta shacabka ee la dhisaya(dugsiyada waxbarashada, xaruumaha caafimaadka iyo maxkamadaha, xaruumaha madaadalada iwm ) dhismayaasha /fooqa iyo guryaha hoygu ay ku haboon yihiin xalaadaha caruurta oo ay ku jiraan meelaha laga baxo iyo kuwa madadaalada caruurta;

3.3.12**. Arrimaha Mudnaan Lagu Siinayo Qaybaha biyaha iyo tamarta**

**Mudnaanta koobaad ee saktarkani:-** adeegyada biyaha nadiifta ee la cabo inta caruurta la gaadhsiiyo lagana haqaabtiro islamarkaana la dardargalinayo ilaha tamarta iyo farsamooyinka xulka ah ee waxtarka u leh in la ilaaliyo xuquuqaha iyo fayaqabka caruurta;

**Qodobada faah-faahsan**

- Xaqiijinta helitaanka adeegyada biyo nadiif ah oo la cabo;
- Dardargalinta illo kala duwan oo tamareed oo ay caruurtu ka fa'iidaysan karan;
- Dardargalinta iyo soo bandhigida farsamooyin leh tashiilaad xabaada;
- In mashaariicaha la fulinayo lagu daro lana hirgaliyo qorshe lagu abuurayo wacyigalin lagu abuurayo baraaruga xuquuqaha caruurta iyo ka hortaga ku xoogsiga iyo ku takrifaalka xooga caruurta;
- Fulinta hawlo wacyigalin loo lagaga hortagayo si caruurtu ayna ugu waxyeeloobin khataarta laydhka islamarkaana la suurtogaliyo taabogalinta talaabooyinka lama huraanka ah ee taxaadir iyo foojignaan;
- Marka la hindisayo mashaaricaha biyaha iyo tamarta in la xaqiijiyo inay munaasib ku yihiin caruurta islamarkaana ayna keenayn waxkasta oo waxyeelo ku ah caruurta;

3.3.13. **Arrimaha Mudnaan Lagu Siinayo Hay'adda Arrimaha Federaalka**

**Mudnaanta koobaad ee saktarkani**:- si loo abuur deganaansho shacab waa in la suurtogaliyo kobco horumar oo isku dheelitiran oo ka dhexeeya ama ay wadaagan

deegaanadu islamarkaana xilliyada isku dhacyada iyo masiibooyinka dabiciga ah caruurta mudnaan gaara la siinayo waa in la horseedo hanaanka ku haboon ee lagu ilaalinayo xuquuqaha iyo fayaqabka caruurta.

**Qodobada faah-faahsan**

- xiliyada isku-dhacyada, xilliyada masiibooyinka dadku sabaaban iyo kuwa daabiciga ahba inta caruurta mudnaan garaa la siiyo tageero loo fidiyo;
- si loo suurtogaliyo dhawrista xuquuqaha iyo fayaqabka caruurta islamarkaana loo dhamaystiro xalaadaha lama huraanka u ah habsami u barbaarintooda waa in maamuladda deegaanada gaar ahaan kuwa soo koraya taageero loo fidiyo;
- Xaqiijinta in hawlaha shaqo ee booliska federaalka, hay'adda jeelasha ama asluubta ee federaalku ay ku hawlgaleen hanaan mudnaan siinaya xuquuqaha iyo fayaqabka caruurta;
- In hay'adda jeelasha ama asluubta lagu tageero sidii caruurta jeelka kula nool hooyoyinkood iyo caruurta ay dhalan hooyoyinka iyagoo uur leh jeelka la keenay waa in qaab ka duwan waayeelka miisaaniyad loogu qoondeeyo islamarkaana lagu dabagalo tusaale arimaha caafimaadka waxbarashada iyo agabyada kala duwan iwm.

3.3.14. **Arrimaha Mudnaan Lagu Siinayo Qaybaha beeraha፣**

**Mudnaanta koobaad ee saktarkani፥-** in la abuuro xalaadaha ku haboon ee caruurta waalidkoodii waayey ee ku nool xalaad xun oo qalaafsan mudnaan laga siinayo qaybaha kale ee bulshada islamarkaana ay dhulkii waalidkooda qaab dhaxal ah ay ugu helayan.

**Qodobada faah-faahsan**

- Si loo hagaajiyo islamarkaana wax looga qabta hanaanka barbaarinta iyo koriinka in la Taabogaliyo hanaan mudnaanta siinaya ka fa'iidaysiga caruurta ee dhinacyada damaanad-qaadka cuntada iyo quudinta caruurta;
- In la abuuro xalaadaha ku haboon ee horseedi kara ka fa'iidaysiga caruurta ee horumaarinta miyiga iyo kabayaasha horumaarineed ee asaasiga ah;

- In lagu hawlgalo laguna shaqeeyo hanaan suurtogalinayo in si xilliyada masiibooyinka dadku keeno iyo kuwa daabiciga ahba in mudnaan gaara la siiyo sugida fayaqabka caruurta;
- Si qaybaha wax soo saarka beeraha lagu dhiso tamarta dhaqaale ee qoysaska xalaadoodu ka hooseeyso xadiga u yaala saboolnimada islamarkaana la suurtogalinayo barnaamijyo lagu maalgalinayo si ay wax ula soo baxan waa in mudnaan la siiyo maashariicas waxtarka u leh tageero-siinta iyo daryeelka caruurta agoonta ah looga fa'iideeyo;
- Xafiisyada beeraha iyo horumaarinta reer guuragu waa inay agaasiman qorshayaasha hawlgal ee lagu xaqiijinayo damaanada cunatada ee deegaanada;

3.3.15**. Arrimaha Mudnaan Lagu Siinayo Qaybaha maamulka iyo isticmaalka dhulka miyiga፣**

- Suurtogalinta in caruurta agoonta ah ee waalidkoodii waayey ay dhulkii waalidkoodu ka tagay ay qaab dhaxal ahaan ay ku helan;
- Suurtogalinta xalaadaha ku haboon ee caruurta waalidkoodu ku jiran xalaad xun oo caafimaad daro ay helitaanka dhulka mudnaan laga siiyo qaybaha kale ee bulshada;
- caruurta dhulka ay isticmaalayan Si aan looga xoogin islamarkaana aan loogala wareegin waa in iyadoo lala kaashanayo laamaha caddaalada la toosiyo lana saxo;
- suurtogalinta in hadba xadka da'doodu iyo awoodoodu u samaaxdo caruurta laga qaybgaliyo hawlaha ilaalinta degaanka;

3.3.16. **Arrimaha Mudnaan Lagu Siinayo Qaybaha ka hortagga masiibooyinka፣**

**Mudnaanta koobaad ee saktarkani፡-** iyadoo la dajinayo hanaan waara oo lagu xaqiijinayo damaanada cuntada ee caruurta agoonta ee ku sugan xalaad nolooleed oo aad u liidata waa in laga shaqeeyo sidii loo xakamayn lahaa islamarkaana hortagi lahaa waxyeelada soo gaadhi karta;

**Qodobada faah-faahsan**

- iyadoo la taabogalinayo daraasad u kuurgal oo deg-deg ah oo ku wajaahan xalaada iyo quudinta cuntada si ayna hooyada iyo caruurtuba ayna u asiibin waxleeyo la xidhiidha cunto yarida waa in si loo dhimo u nuglaanta masiibooyinka la hirgaliyo barnaamijyada digniinta hore;
- iyadoo la ogaanayo caruurta u nuguul cunto la'aanta ama masiibooyinka waa in maalinkasta loo qaybiyo caruurta u baahan raashiin gargaar ah;
- waa in qaybaha ay khuseeyso lagala shaqeeyo jiritaanka adeeg iyo hanaan quudin oo daweeyn waata oo loo fidiyo caruurta ay asiibtay macaaluusha ka dhalatay cunto la'aanta;
- waa in la taabogaliyo barnaamijyo deg-dega ah oo dib u dajin loogu sameeynayo caruurta iyo qoysaskooda hantidoodii iyo degaankoodiiba uga barakaacay sabaabo la xidhiidha masiibooyinka daabiciga ah iyo kuwa adaamuhu kalifaba;

3.3.17. **Arrimaha Mudnaan Lagu Siinayo Qaybaha Ciyaaraha**

**Mudnaanta koobaad ee saktarkani:-** iyadoo la dardargalinayo xalaadaha ku haboon ee caruurtu uga qaybqadanaya islamarkaana uga fa'iidaysanayan dhamaan dhaq-dhaqdhaqaaqyada kala duwan ee ciyaaraha in la suurtogaliyo koorin jidheed iyo maskaxeed iyo caafimaad oo dhamaystiraan;

**Qodobada faah-faahsan**

- Abuurista xalaadaha ku haboon ee horseedaya ka fa'iidaysiga iyo hab wafaaqsan rabitaankooda iyo haybadooda ay hadba sida ugu haboon uga qaybgalayan dhaqdhaqaaqyada kala duwan ee ciyaaraha;
- Fuduudeynta xalaadaha ku haboon in agabka ciyaaraha iyo xaruumaha madaadalada lagu balaadhin karo qaab munaasib ku ah caruurta;

- Abuurista fursad simaan oo suurtogalin karta in haweenka caruurta ahii si la mid ah raga ay uga qaybqadan karan ciyaaraha sboortiga, iyo kobcinta iyo kor u qadiida ka qaybgalka iyo ka fa'iidaysiga caiyaaraha ee caruurta laxaadka la';
- Abuurista xalaadaha munaasibka ku ah siyaabaha haweenka uurka leh ay uga qaybgali karan noocyada ciyaaraha ee ku haboon;
- Diyaarinta iyo qaybinta awaamiir ay ku dhaqmayan hay'addaha caruurta u fidiya adeegyada ciyaaraha islamarkaana xaqiijinta ku dhaqankooda;
- Dajinta qorshe suurtogalinaya in caruurtu ay hanaan fir-fircoon kaga qaybqadan karan tartanada ciyaaraha kala duwan ee laga fulinayo heerarka kala duwan;
- Suurtogalinta in caruurtu ay qayb ka noqdaan mashaariicaha ciyaaraha islamarkaana u heli lahayeen tababaro xirfadeed;

3.3.18. **Arrimaha Mudnaan Lagu Siinayo dhamaan hay'addaha bahwadaagtu intay mudnaan siiyan looga baahan yahay inay dhaqangaliyan**

Dhamaan hay'addaha dawliga ah iyo kuwa aan dawliga ahayn, hay'addaha samafalka, uruurada rayidka ah/ (qaab-dhismeedyada haweenka iyo dhalinyarta), uruurada xirfadlayaasha, uruurada ganacsatada/, hay'addaha gaarka loo leeyahay, uruurada horumaarinta iwm markasta oo ay ku hawlan yihiin hirgalinta ujeedooyinka ay u asaasan yihiin waxaa looga baahan yahay inay iyagoo maanka ku haya arrimaha hoos ku cad ee la xidhiidha caruurta ay hawlahooda ku daran oo ay dhaqangaliyan.

- In xeerka lagu maamulo hay'adda lagu tilmaamo ama la cadeeyo mawquufka hay'add ahaan kaga aadan dhinacyada ilaalinta iyo taabogalinta xuquuqaha iyo fayaqabka caruurta/ diyaarinta siyaadasada hay'addeed eek u aadan caruurta/;
- Suurtogalinta in marka la diyaarinayo iyo marka la hirgalinayo barnaanijyada iyo mashaaricahaba ay yihiin kuwo ku jahaysan ka qaybgalka iyo rabitaanka caruurta oo dhan;
- In qaabdhismeedyada ka shaqeeya barnaamiyada tageero-siinta iyo daryeelka caruurta ee mujtaamaca ku saleeysan iyo qaab-dhismeedyda arrimaha haweenka iyo caruurta lagu tabaaruco hawlaha tageerada maaliyadeed,

farsamo iyo kobcinta awoodeed islamarkaana la suurtogaliyo ka fa'iidaysiga caruurta;

- Hay'addaha aan dawliga ahayn iyagoo abuurayo nidaam iskaashi oo wada shaqeeyneed kana fooganaya shaqooyinka isku midka ah iyo six un u isticmaalida khayraadka waa inay xaqiijiyan ka fa'iidaysiga caruurta;
- Intay dawladda isbar-bartaagan oo ay diyaariyan barnaamijyo iyo mashaariico caruurta waxtar iyo fa'iido u leh waa in la dhaqangaliyo islamarkaana hirgalintooda la dabagalo;
- Qorshayaashooda iyo baraamijyadooda iyagoo ku daraya siyaasadaha iyo hawlgalada waxqabad ee horumaarineed ee ku soo baxay ka fa'iidaysiga caruurta waa inay ku hawlgalan;
- Iyagoo ka ambaqaadaya ujeedooyinka xafiiska intay meel-maariyan daraasado ku wajahaan caruurta waa inay soo jeediyan afkaar xal ah;
- Xaqiijinta in adeegyada ay bixiyan ama wax soo saarka ay soo saran ay yihiin kuwo mudnaanta siinaya xuquuqaha iyo fayaqabka caruurta;
- In arrimaha caruurta lagu daro qaab-dhismeedka saktarka islamarkaana loo hawlgaliyo wakiilka arrimaha caruurta iyo in arrimaha caruurta loo qoondeeyo miisaaniyad ku filan;
- Si loo xaqiijiyo ka fa'iidaysiga caruurta ee saktarka In macluumaadka la xidhiidha hawlaha laga qabtay dhinacyada xuquuqaha, fayaqabka iyo daryeelka caruurta in la xafido warbixin xambarsan xog ku dheelitiraan dhediga iyo labka islamarkaana rubuc sanadeedkasta loo gudbiyo qaybaha ay khuseeyso(age sex disaggregated data);
- Fulinta daraasad iyo cilmi-baadhis ku aadan dhibaatooyinka dhinaca bulshada ka haysta caruurta , uruurinta, iskudubaaridka iyo baahinta macluumaadka la xidhiidha xalaadaha guud ee caruurta;
- Suurtogalinta barnaamijiyo kala duwan oo lagu tageerayo islamarkaana daryeelayo caruurta agoonta ah ee ku sugan xalaad adag;

# Qaybta Afraad

# Nidaamka dabagalka iyo qiimaynta

‘

Iyadoo Arrimaha caruurta lagu lamaaneynayo qorshaha iyo barnaamijyada kala duwan ee hay'adkasta, xuquuqaha iyo fayaqabka caruurta Waxaa la xaqiijin kara oo kaliya marka la dhaqangaliyo qaab shaqeed waara iyo hanaan fulineed oo hay'addeed. Sidaasi daraadeed, waxaa loo baahan yahay in dhamaan bahwadaagta oo dhan iyadoo arrimaha caruurta ku sameeynaysa falanqeeyn ku fadhida aqoon iyo macluumaad dhab ah, una kuurgalaysa arrimaha mudnaanta leh, islamarkaana arrimahas intay halbeeg u dajiyan ay qorsheeyan, in xiliga hirgalinta ay u jeexan nidaam adag oo dabagal iyo tageero-siin islamarkaana marka laga eego in la diyaariyo lana habeeyo warbixin xambarsan xog isku dheelitiraan ee dhediga iyo labka oo tibaaxaysa guulaha laga soo hooyey dhinacyada  xalaada ka fa'iidaysiga caruurta ee hay'adda(age sex disaggregated data) in xilikasta loo gudbiyo laamaha ay khuseeyso.

Hadaba, arrintani si loo dhaqangaliyo waxaa loo baahan yahay in jaran-jarooyinka kala duwan laga taabogaliyo hanaan mida oo dabagal iyo qiimayneed.sidaasi daraadeed waxaa loo baahan yahay in hanaan adag oo leh ka qaybgalin oo dabagal iyo qiimayneed ay hay'addaha qaybaha hoose lagu tilmaamay ay heerba heer u taabogaliyan.

### 4.1. **Golayaasha shacabka iyo hay'addaha loo igmaday awooda korjoogteynta**

Golayaasha shacabka ee heerarka kala duwan waxaa looga baahan yahay inay door baxaad leh ka gaystaan xaqiijinta iyo taabogalinta nidaam kormeer iyo dabagal oo horseedi kara xaqiijinta in siyaasadaha, qorshayaasha iyo warbixinaha ay u soo jeedinayan hay'addaha hawlfulintu ay yihiin kuwo suurtogalinaya ilaalinta xuquuqaha, faya-qaabka iyo ka fa'iidaysiga caruurta.

Sidoo kale, qaab-dhismeedyada komiishinka xuquuqul-insaanka iyo hay'adda qaabilaada cabaashooyinka ee heerarka kala duwan waxaa looga baahan yahay

inay taabogaliyan nidaam komeer iyo qiimayn oo lagu xaqiijinayo jiritaan qorshayaal iyo hanaan shaqo oo ku haboon islamarkaana waxtar u leh caruurta ay suurtogaliyeen hay'addaha ay dabagalka ama korjoogteeynta ay ku sameeyan islamarkaana ay dhaqangaliyeen.

## 4.2. **Qaybta Arrimaha Haweenka, Caruurta iyo Dhalinyaraada:**

Si loogu guulaysto taabogalinta xeeladaha iyo tabaha ku saleeysan hanaanka fulineed ee arrimaha caruurtu qaybta ka yihiin qaybta arrimaha Arrimaha Haweenka, Caruurta iyo Dhalinyaraada ee xilka iyo wajibaadku ka saran yahay iskudubaaridka, dabagalka, kormeerka iyo qiimaynta hawlaha laga qabanayo dhinacyada caruurta waxay masuuliyad balaadhani ka saran tahay taabogalinta nidaam kormeer iyo dabagal oo lagu xaqiijinayo xafiisyada saktarkani iyo laamaha kale ee dawladdeed ee ka hawlagala heerarka kala duwan ee qaab-dhismeed inay ay masuuliyada saran u hirgaliyeen hanaan munaasiba oo abaabulan.

Sidaasi awgeed, Qaybta Arrimaha Haweenka, Caruurta iyo Dhalinyaraada waxaa looga baahan yahay inay dabagalan islamarkaana fal-celin ka bixiyan in siyaasadaha, qorshayaasha iyo barnaamijyada ay diyaariyan xafiisyada saktarkani iyo laamaha kale ee dawladdeed ee ka hawlagala heerarka kala duwan ee qaab-dhismeedka maamul u yahay kuwo ku xisaabtamay maanka na ku haya danaha iyo baahiyaha iyo rabitaanka dhabta ah ee caruurta islamarkaana xaqiijinaya ka fa'iidaysigooda. Waxaana la doonaya inay hubiyan in soo jeedintooda iyo fal-celinta ay ka bixiyeen lagu daray oo lagu dhaqamayo.

Sidoo kale, qaybaha arrimaha haweenka , caruurta iyo dhalinyraada eek a hawlgala heerarka kala duwan waxaa looga baahan yahay inay Hay'addaha bahwadaagta ah ee la soo sheegay ay ku dabagalan soo gudbinta warbixin waxqabad xilliga ku haboon, qiimaynta iyo ka talo-bixinta waxqabadka iyo natiijada laga gaadhay, la socodka iyo xaqiijinta in lagu daray talo bixintii la siiyay iyo sidoo kale, in ay arrimaha la halmaala ka qaybnoqoshada arrimaha caruurta ay adeeg xirfadeed siiyan islamarkaana ay meel-maariyan hawlo lagu xoojinayo laguna awoodsiinta hay'addeed.

## 4.3. **Xafiisyada iyo Saktarada Kala Duwan**

Xafiiskasta ama saktarkasta waxaa looga baahan yahay inu taabogaliyo hanaan shaqo oo lagu dabagalayo islamarkaana qiimaynayo in xafiiska marka laga eego wajibaadka iyo awoodaha sharciga lagu siiyay xafiisyada kale ee xafiiska hoos yimaada ama kuwa u fasaxa siiyo ama loo awoodsiiyay inay kormeeran ay arrimaha caruurta ay ku daraan siyaasadaha, qorshaha iyo barnaamijyada iyo mashaaricaha laamahani, islamarkaana la dhaqangaliyay iyo qiimaynta iyo dabagalka natiijada laga soo hooyey.

Nidaamka dabagalka iyo qiimaynta ee qaabkani loo taabogalinayo in saktarkani iyo laamaha kale ee hoos yimaada adeegyada iyo wax soo saarka ay siiyan caruurtu ay yihiin kuwo ku haboon islamarkaana jahaysan caruurta, kuwo danaha iyo rabitaanka caruurta siinaya mudnaan ama fayaqaabkooda aan waxyeelo u gaysaneyn caruurta, islamarkaana suurtogalin kara xaqiijinta in ay yihiin kuwo la gaadhsiiyay. Hadaba si arrintani loo dhaqangaliyo waa in xafiiskasta u diyaarsado habraaca iyo jeeklistiga dabagalka hanaanka ku darida arrimaha caruurta /Check list/.